MAJALADDA MARAG
Cadadka 16-aad | July 2026

# JAMHUURIYAD QABYO AH:

## 66 SANO KADDIB, XUS IYO XASUUS IS-KHILAAFSAN


Xildh. Cabdullaahi Faarax Mire

Bogga: 39



Xigashada Sawirka: AI

# Qorayaasha Majaladda


**Dal qalaad iyo da'yarta Soomaaliyeed:** Dugulka Soomaali baad mooddaa misna waa duul kale! (Qaybtii 2-aad)
Cabdiweli Axmed Muumin — 4



**Dib-u-eegis Dowlad-dhiska Soomaaliya:** Guulo, Caqabado iyo Talooyin
Caasha Geele Diiriye — 8



**Dhan Mise Dhimman? Siyaasadda Waxbarashada Puntland (Qaybta 2-aad)**
Bashiir Suuley — 13



**Qaadku waa Maandooriye:** Caddeymaha Cilmiga, Mamnuucidda Caalamiga ah iyo Aragtida Shareecada Islaamka **qeybta 4aad**
Dr. Cabdinaasir Jaamac Warsame — 16



**Soomaaliya 66 Sano Kadib: Guul Mise Guuldarro?**
Dr. Maxamuud C/Raxmaan — 20



**28 Sano Kadib Asaaskii Puntland:** Ballantii Garoowe iyo Xisaabta Taariikhda
Zakaria Xaaji Axmed Iley Rabiica — 25



**Sagaalka Qodob oo Qaabeeyey Bulshada Soomaaliyeed**
Dr. Cabdiraxmaan Baadiyow — 28



**Dareenka Lahaanshaha Qaranka:** Caqabadaha Wacyi-la'aanta iyo Waddooyinka Xalka
Abdulljabaar Maxamed Farma — 32



**Taxanaha "Diin iyo Dawlad" Qeybta 3-aad**
Dr. Maxamed Cali Faarax — 35



**Jamhuuriyad Qabyo ah:** 66 Sano Kaddib, Xus iyo Xasuus Is-khilaafsan
Xildh. Cabdullaahi Faarax Mire — 39



**Baqdaadey Salaamaad:** Hoyga Dhaqanka, Fanka & Ilbaxnimada
Maxamuud Cali Aadan Hoorri — 43



**Horusocodka Siyaasadeed, Samagaradnimada iyo Sijiragaradnimada:** Aragti Ku Saabsan Geeddi-socodka Ilbaxnimada Bulshada
Mansur Mukhtar Nurre (Garyaqaan Masalasheege) — 46

# Dhambaalka Tifaftiraha

Waxaa farxad iyo bogaadin mudan in aan soo saarno **cadadka 16-aad** ee **Majalladda Marag**, oo ah madal warbaahineed oo loogu talagalay in lagu daabaco macluumaad kala duwan sida warbixino, falanqayno, iyo aragtiyo ay diyaariyeen dad kala duwan oo ka tirsan bulshada, sida cilmi-baarayaal, suxufiyiin, aqoonyahano, hal-abuurro, iyo dadka kale oo khibrad iyo aqoon u leh dhinacyada kala duwan ee taabanaya nolosha bulshadeena.

Majaladan ujeedkeedu waa in la helo madal ka duwan warbaahinta dalka ka jirta, kuwaas oo inta badan xoogga saara soo tebinta dhacdooyinka maalinlaha ah. Majalladdan waxay hiigsaneysaa inay bulshada u gudbiso macluumaad dhigaal noqda, waxtar leh oo kor u qaada wacyiga iyo fahamka bulshada, kobciya doodaha iyo aragtiyaha caafimaadka qaba, soo bandhiga dhaliilo wax dhisaya oo daahfuran, islamarkaana dhiirrigeliya bulshada gaar ahaan dhallinyarada, si ay u noqdaan kuwo xog ogaal ah, si buuxda u fahma xaaladda dhabta ah, una gaari karaan go'aammo sax ah oo noloshooda iyo bulshada wax ku ool u ah.

Marag waxay ka madax-bannaan tahay aragtiyaha siyaasadeed ee kala duwan ee dalka ka jira, waxayna u furan tahay qof kasta oo doonaya inuu bulshada la wadaago fikrado, warbixino iyo falanqayno ku salaysan aqoon, cilmi iyo waayo-aragnimo.


Cadadka 16-aad ee Marag waxa uu xambaarsan yahay qormooyin iyo taxanayaal ay ka mid yihiin: 28 Sano Kadib Asaaskii Puntland: Ballantii Garoowe iyo Xisaabta Taariikhda, Sagaalka Qodob ee Qaabeeyey Bulshada Soomaaliyeed, Maxkamadda Dastuuriga ah: Muhiimadeeda iyo Maqnaanshaheeda, Jamhuuriyad Qabyo ah: 66 Sano Kaddib, Xus iyo Xasuus Is-khilaafsan, Dib-u-eegis Dawlad-dhiska Soomaaliya: Guulo, Caqabado iyo Talooyin, Soomaaliya 66 Sano Kadib: Guul Mise Guuldarro?, iyo taxanayaasha "Diin iyo Dawlad" (Qaybta 3-aad), "Dal Qalaad iyo Da'yarta Soomaaliyeed: Dugulka Soomaali baad Mooddaa, Misna Waa Duul Kale!" (Qaybta 2-aad), iyo "Dhan Mise Dhimman? Siyaasadda Waxbarashada Puntland" (Qaybta 2-aad).

**Cabdi Cumar Bile**

Tifatiraha Guud

# DAL QALAAD IYO DA'YARTA SOOMAALIYEED:

## DUGULKA SOOMAALI BAAD MOODDAA MISNA WAA DUUL KALE! (QAYBTII 2-AAD)



Cabdiweli Axmed Muumin



Xigashada Sawirka: AI

## ARAR

Qoraalkeennii midakan ka horreeyey waataynu ku joojinney "Soomaalidu uguma horrayn dad islaam ah oo inta dalkoodii ka yimaada Yurub rugeysta oo dega: dad badan oo Muslimka Aasiya ah baa uga horreeyey, tira ahaanna aad uga badnaa Soomaalidii badmaaxa ahayd ee horraantii 1900-ladii maraakiibta iyo dekedaha Yurub, gaar aahaan Ingiriiska, ka xoogsan jirtey".

Inkastoo uu qoraal leeddo fuula ahaa, oo aynaan kansho u helin inaynu dhab u 'kooraysanno', misana waxa ugu weyn oo aynu ka maagganayn baa ahaa inuu qaybaha daba yaal oo ay tani ugu horrayso uu arar iyo gogoldhig u noqdo, si ay warbixintu si san ugu hirgasho. Waa yahay.

## OO YAA KA HORREEYEY

Aynu sii wadannee, Soomaalidu Islaan Yurub ama Ameerika yimaada, si beelaysan , uguma aysan horrayn: waxaa ka horreeyey dadyow badan, markaan islaamka ka hadlayno, oo ay ugu ballaaran yihiin dadyowga Aasiyaan ama 'timajilica' loo garan ogyahay, oo ka kala soo jeeda deegaammo dhawra oo ay ka mid yhiin Hindiya, Bakistaan iyo Bagaladheesh, inta ugu ballaaran markaan ka soo qaadanno. Imaanshaha dadyowgan Yurub, sida badan, Ameerika iyo Kanada, si goosgoos ah , ayaa waxaa u sabab u ah inay ka soo jeedaan dalweynihii Hindiya la isku oran jirey oo ay horraantii gumeysiga Ingiriiska ka wada tirsanaayeen, intii uusan kala jarjarin. Maadaama uu gumeystuhu af, siyaasad, iyo dhaqan-aqooneed ahaanba saameeyey dadyowgan, waxay ugu xisheen soo aadiddiisa xargaha dhaqan, iyo kuwa dhaqan-dhaqaale ee ka dhex abuurmay iyaga iyo gumeystihii, gaar ahaan Ingiriiska, ka dib markay ka 'xoroobeen'!

Waxaa dadkan weheliyey xayn-xayn dadyowga kale ah, sida Afrikada la soo gumeystey , oo ay ugu weyntahay Neyjeeriya. Waxaa kaloo iyaguna jira Carab aan sii badnayn oo aan muuqaal la sheego ku lahayn bulshada dhexdeeda, marka laga reebo Faransiiska oo ay si muuqata u joogeen Carabta uu horay u gumeystey, afkiisana ka yeeshay af-aqooneedka, gaar ahaan Carabta waqooyiga Afrika, sida Aljeeriya oo uu si ba'an uu u gummaaday xilligii gumeysiga, iyo weliba Marooko oo iyana si dheeriya loogaga hadlo Faransiiska , iyo weliba afaf kale oo reer Yurub ah, sida Isbaanishka . Intaas waxaa weheliyeye waxoogaa Afrikada waqooyi ah, oo iyaguna ah Afrikada uu Faransiisku gumeystey, inteeda badan na diinta Islaamka laga haysto.

Intaas haddaynu isla sheegnay, waxaa iyana isweydiin mudan, tolow dadyowgan Soomaalida ka soo horreeyey waa dad noocee ah; xagga aqoonta, xadaaradda, ilbaxnimada, iyo weliba sababaha keenay Yurub ee ay u joogeen. Waa su'aal aad inoogu muhiima marka qoraalkeena laga hadlayo, maxaa yeelay waxay wax weyn ka iftiiminaysaa sida iyo waxa ay kaga duwan yihiin Soomaalida Yurub u soo hayaantay, iyo fahanka laga qaadanayo waxay kala kulantay imaansheheedii Yurub, iyo guud ahaanba qurbaha, innagoo barbar dhigayna dadyowgan kale. Dadyowga aynu soo hadalqaadnay ee aan Soomaalida ahayn ayaa siyaabo waaweyn oo kala duwan uga duwanaa dadka Soomaaliyeed ee isna yimid dalalka Reer Galbeedka. Aynu kala qaadnee, waxaa siyaabahaas ka mida oo ugu mudan kuwan:

1. **Siyaasad:** dadkan intiisa badan ayaa u yimid si aan qaxootinimo ahayn, ee u yimid si 'rasmi' ah, sida hawlgal siyaasadeed oo ay dalkoodii hooyo u hayaan, amaba baxsad iyo magangalyo-doon siyaasadeed, sida jaajuusnimo lagu helay ama looga shakiyey, iyo goosasho ay ka goosteen dawladdoodii, hawlo siyaasadeed awgood. Sidoo kale waxa iyana jirey kooxo ku foogganaa siyaasado ka duwan kuwa dalkoodii hooyo ka jira, sidaas darteedna fariisimo ka samaystay dalalka Reer Galbeedka. Sidoo kale kooxahani waxay u adeegayeen dana guud oo siyaadeed oo dalalka magangelyada siiyey u dan ah, iyagu ama ha moogaadeen ama ha u muraadeene.
2. **Waxbarasho:** dad arday ah oo iyaguna waxbarasho u joogey baa jirey. Inta badan ardaydan waxaa soo dirsaday dawladahoodii. Qaar ka mida ayaa la dhici jirey hannaanka iyo hab-dhaqanka waddamada Reer Galbeedka, waxayna dooran jireen ama u dadaali jireen inay degaan oo aysan dib ugu laaban dalkoodii hooyo.
3. **Qaraabo:** marka laga yimaado diblomaasiyadda iyo waxbarashada dadka

u yimid, waxaa iyana jiri karey qaraabo si sharci ah ugu timid labadan qolo ee hore, inta badanna waxay ahaayeen ama waalid ama dad isqaba oo qoys ah.

4. **Badmaax:** waataynu qoraalkeenna qaybtiisii hore ku soo sheegnay badmaaxyadii Soomaalida ahaa. Waxaa la mid ahaa kuwa dadyowga kale ee Reer Galbeedku ay horay u gumeysteen ahaa. Kooxahan badmaaxyada ahaa ayaa aad uga badnaa Soomaalida badmaaxa ahayd. Waxaa iyana jirey, gaar ahaan Faransiiska, dad badan oo ama iyaga ama aabayaashood ay ka tirsanaayeen ciidamadii gumeystaha, kana qaybgalay dagaalkii koowaad iyo kii labaad ee adduunka: Askartan in badan oo ka mida ayaa waxay degmeysteen dalal Reer Galbeedka ahaa oo ay u dagaallameen, iyagoo dhalasho iyo xuquuqba ku yeeshay.

Marka laga reebo badmaaxyada, gaar ahaan kuwa Soomaaliyeed oo asal ahaan miyi ka soo jeeday - waataynu horay uga hadalnay-, dadyowgan badankiisu waxay ahaayeen beelo iyo ummado fadhiid ah oo deggan; aan reer guuraa ahayn, gaar ahaan dadka Aasiya ka soo jeeda; waa dad ku abtirsada ilbaxnimo guuna oo kumannaan sano oo fadhi iyo fekerba tirsanaysa. Waa dad nolosha kaadsiimo u leh oo ay soo xukumeen dawlado Gaal iyo Muslimba leh oo qaarkood ay boqollaal sano tirsadeen. Intaas oo af iyo dhaqan oo kala duwan baa ka jira dalalka ay ka yimaadeen. Waa hore bay waayuhu u laylyeen siday dad iyo dhaqan ka duwan kuwooda oo weliba ka xoog weyn ula noolaan lahaayeen, waxna ula qaybsan lahaayeen, iyagoo waliba hiddohoodii, diintoodii, afkoodii, iyo guud ahaanba dhaqankoodii dhawranaya oo caynsanaya. Karti, xeelad, wada-shaqayn, iyo isku-tiirsanaan iyo isku-tashi baana dhaqan u ah. Iyadoon la isjeclayn, gacalo na aysan jirin, baa la garwaaqsaday in cadow ka weyni jiro, ayna kaga dabaalan karaan wadajir iyo isku duubni keliya. Hawraarsan baa la isyiri.

Waxaa intaas dheer inay yihiin, badankooda aan iraahdee, xulkii amaba labeentii umaddooda; dad reer-magaal ah oo ugu yaraan dad magaalo iyo shuqulkeeda yaqaan ah, haddaanba aqooni u dheerayn. Guud ahaan waa dad bulshaday ka soo jeedaan meel sare kaga jira, oo garwaaqsan kara waxay luminayaan iyo waxay korορsanayaan, iyo weliba intay isu jiraan labadu. Taasayna guddoonkooda nololeed ku salaynayaan; inay sal dhigtaan meesha ay yimaadeen, si buuxda, iyo inay dalkoodii hooyo ku noqdaan. Arrimahaan ayaa keenay in dadkaan intiisa badani uusan wax weyn oo dhaqan iyo hidde ah uusan lumin, ceebtooda iyo goosan dayacan oo laga helaa na ay yaraato.

Xagga Carabta markaan u kacno waxaa Aasiyaanka la mida oo la hannaan ah Suuriyaanka, Ciraaqiyiinta, iyo Masaarida. Waana dhulal ay ilbaxnimo bulsho ka jirtey ka hor intaan Islaamku biyadhigan, ka dibna waa ay sii bulaaleen oo waxay muddo boqollaal sano ah saldhigyo u ahaayeen dawladihii Islaamka ee adduunka maasheeyey, ilbaxnimadana gaarsiiyey.

## GOORMAA LA ISBUURTAY

Wixii sagaashanaadkii ka dambeeyey, waxaa si weyn u jabay oo isu furmay, si ah kas ama kama' labadaba, irdihii waddamada Reer Galbeedka iyo dadyowga dunida saddexaad ; waxaa Yurub iyo Ameerikaba soo galay bulshooyin ballaaran oo malaayiin gaaraya, ka dib markii uu Reer Galbeedku dumiyey dawladihii dadyowgani ay dhisteen oo harsanayeen, hannaankay doonaan ha u mareene, xoog iyo xeelad labadaba.

Soomaalida dad aan badnayn baa waayahakan -wixii sagaashanaadkii ka horreeyey- ka yimid, qaxooti ahaan, tiro aan badnayn. Inkastoo ay si qubane ah u imanayeen dad aan boqollaal gaaraynin oo u badnaa qaxootigii waqooyi galbeed ee jamhuuriyaddii Soomaaliya ee xilligaasi jirtey -waa gobolka ismaamulka gooni-goosiga ah ee marakan la baxay Soomaliland-, kana soo barakacay gobolkaasi baa soo galay Ingiriiska. Ma uusan jirin socdaal qaxootiyeed oo shub ah wixii ka horreeyey 1991-dii. Dadkan kooban oo qaxooti ahaan u soo galay Yurub, gaar ahaan Ingiriiska, waxaa qaxootigaasi sababay in gobolka waqooyi galbeed ay xilligaasi ka dillaacday jamhad hubaysan oo dawladdii dhexe ee xilligaasi jirtey dagaal la gashay, dagaalkaasi oo dabadeed saameeyey bulshadii gobolka. Intaas marka laga reebo, Soomaalida xooggeedu, sidaynu qoraalka qaybtiisa koowaad ku soo sheegnay, waxay soo 'gashay' waddamada Reer Galbeedka, iyadoo qax ah, wixii ka dambeeyey 1991-dii.

Waataynu wax ka niri noocyada dadyowga kale ee qaxooti ahaan, iyo weliba siyaabo kale oo badan

ku soo galay dalalka Reer Galbeedka. Waataynu sheegnay inay ahaayeen, guud ahaan, xulkii bulshadaas ay ka yimaadeen ama ka soo jeedeen. Waataynu sheegnay inay ahaayeen dadyow ilbaxnimo guuna dugsanaya oo ka abtirsanaya waayo aragnimo bulsho iyo mid dhaqan oo kumanaan sano soo taxnayd, aadna u gaamurtay. Arrimahakan ayaana u suura geliyey, baynu niri, inay yeeshaan karti ay ugu babacdhigaan xadaaradda Reer Galbeedka ee dhaldhalaalka iyo dhoolatuska badan wadata, dadka wixii aan dhiifoonay na siraysa, dabdeedna bi'inaysa. Sida waayeel dad qalaad martiyey, waxay garwaaqsan kareen - waxaan sheegayaa bulshooyinka aan Soomaalida ahayn ee Reer Galbeedka soo galay - inaan bidhaanta kore runtii ahayn. Markaan soo ururinno, dadyowgani waxay Soomaalida uga duwanaayeen saddex arrimood oo waaweyn, oo sidaan arki doonno, keenay kala-duwanaansha innaga iyo iyaga.

Waa tan koowaade, sidaan marar badan soo sheegnay, waxay ka soo jeedeen ilbaxnimo dabadheer, iyo ummado guuna. waa tan labaade, waxay ahaayeen, badankoodu, aan ku celinnee, xulkii dadkooda, ama ugu yaraan dad magaalo intaas oo jiil ku dhashay kuna dhaqmay. Waa tan saddexaade, 1900-kii markay adduunka kale gumeysatey Yurub oo ay muquunisay, waxay in badan oo dalalkii la gumeystey ka mid ahi - hore waa u soo sheegnay - ka qaateen oo ay kala hareen afkoodii; waxay af-aqooneed u qaateen afkii gumeystaha, gaar ahaan gumeystihii Ingiriiska oo ugu saamayn badnaa gumeystayaasha, sababo badan awgood. Inkastoo uusan dhaqankaani, laf ahaantiisa, mudnaan lahayn oo weliba la oran karo waa gumeysigii oo dadban, haddana waxay dadkaasi afkaas qaatay u fududaysay inay si fudud ula qabsadaan dalkii afkaas lahaa, hadday mutaan oo ay magan u noqdaan. Waxaa u suura galay inay markiiba ka hawl geli karaan oo ay ama shaqaysan karaan, mar hadday afkii yaqaanaan, amaba aqoon-kororsi ka helaan. Waxaa intaas dheer bulsha la diinta ah, sida Amxaarada itoobiya aan niraahno, inay u fududaato inay durba la fal galaan oo aysan jirin qalo diimeed iyo mid dhqan oo weyn oo lagu kala faagto.

Soomaalida qaxa ku timid Yurub markaan fiirinno waa ay ka duwan tahay dadyowgan kale ee aynu ka soo hadalnay, waxaan uga hadlayney na waxay ahayd si aynu u garwaaqsanno, sidaan horaba u soo iri, waayaha Soomaalida waddamada Reer Galbeedka ku soo qaxday iyo waxa keenay saamaynta dhaqan iyo midda diimeed ee ka muuqata afartameeyo sano oo qax iyo qaxooti ka dib. Soomaalidu waxay dadkaasi kale kaga duwanayd saddexdaas ama afartaas arrimood ee aan sheegayba. Kama aysan iman ilbaxnimo magaalo oo fadhiid ah oo jirey xitaa boqol sano oo dagaansho leh; waxay ahaayeen oo dhaqankooda lafdhabar ahi uu ahaa reer-miyinimo iyo reer-guuraa, aan waxba u qornayn, dhito dhaqameed oo kayd ah na aan lahayn. Haddaan u turno waa haddaan niraahno boqolkiiba toban baa magaalo ku dhashay, iyagana waxaa dhalay reer-miyi magaalada soo galay oo aan wax badan oo dhaqan magaalo ah siin karin warasadooda, marka laga tago waxoogaaga ay bowsadeen.

Arrimahan waxaan ku furfuraynaa, Ilaah idankiis, qoraalkeenna qaybtiisa dambe.



# DIB-U-EEGIS DOWLAD-DHISKA SOOMAALIYA:

## GUULO, CAQABADO IYO TALOOYIN



Caasha Geele Diiriye



Xigashada Sawirka: AI

## DULMAR GUUD

Soomaaliya waxay xorriyaddeeda qaadatay sannadkii 1960. Tan iyo xilligaas, dalka waxaa soo maray laba dowladood oo waaweyn: dowladdii rayidka ahayd ee talada haysay intii u dhexeysay 1960 ilaa 1969 iyo dowladdii milateriga ahayd ee xukuntay dalka intii u dhexeysay 1969 ilaa 1991.

Muddadii ay jirtay dowladdii milaterigu, oo ahayd xilligii ugu dheeraa ee dowlad dhexe ay ka talinaysay Soomaaliya, awoodda maamulka iyo go'aan-qaadashadu waxay si weyn ugu uruursanaayeen caasimadda, oo ahayd xarunta dowladda dhexe. Maamullada gobolladu ma lahayn awood maamul oo madax-bannaan, balse waxay si toos ah uga amar qaadan jireen dowladda dhexe. Nidaamkan dhexeeynta ah ayaa sababay in adeegyada aasaasiga ahi ku koobnaadaan caasimadda, halka deegaannada fogfog iyo miyiguna ay ka liitaan helitaanka adeegyada dowladda.

Adeegyada muhiimka ah sida caafimaadka takhasuska leh, waxbarashada sare, ganacsiga waaweyn, dhoofka, iyo fursadaha shaqo ayaa inta badan laga heli jiray caasimadda. Sidaas darteed, shacabka ku nool gobollada kala duwan waxay u soo safri jireen caasimadda si ay u helaan adeegyadaas.

Muhiimadda dhaqaale, maamul iyo adeeg ee ay caasimaddu lahayd awgeed, Soomaalida badankeed waxay doorbideen inay maalgashigooda, ganacsigooda iyo hantidooda ku ururiyaan kuna horumariyaan caasimadda, iyagoo u arkayay meesha ugu amniga badan uguna kalsoonida badan ee fursadaha dhaqaale iyo adeegyada dowladda laga heli karo.

Bilowgii xukunkii milateriga, dalku wuxuu gaaray horumar ballaaran oo saamayn weyn yeeshay. Waxaa la horumariyey khayraadka dabiiciga ah, waxaana la hirgeliyey warshado badan oo wax-soo-saar, kuwaas oo qaarkood laga dhisay gobollada dalka. Waxaa batay wax-soo-saarka beeraha oo dalka dibaddiisa loo dhoofin jiray. Waxbarasho bilaash ah oo gaarsiisnayd heer jaamacadeed ayaa guud ahaan dalka ka jirtay, waxaana reer miyiga la gaarsiiyey akhris-qoraalka. Kaabayaasha dhaqaalaha ayaa iyaguna horumar laga sameeyey, waxaana dalka ku soo noqday aqoonyahannadii dibadda wax ku soo bartay oo hormuud ka noqday horumarka ka socday dhinac walba.

Sanadihii u dambeeyey ee xukunkii dowladdii milateriga, wax walba way is beddeleen. Waxaa bilowday in awooddii ay ku ururto gacmo gaar ah, dhaqaalihiina hoos ayuu u dhacay. Dadkii aqoonta lahaa ayaa dalka isaga baxay, musuqmaasuquna wuxuu gaaray heer sare. Waxaa sidoo kale bilowday jabhado ka soo horjeeday dowladda oo dalka dibaddiisa kaga soo dagaallamay. Isu-socodkii dalka ayaa khatar galay, Soomaalidii walaalaha ahaydna way kala shakiyeen. Arrimahaas ayaa soo dedejiyey bilowgii dagaalkii sokeeye. Ugu dambayn, waxaa burburtay dowladdii dalka ka talinaysay 21-kii sano, Soomaalidii wada dhalatayna dhexdooda ayay qabiil-qabiil ugu dagaallameen, kuna kala qaxeen.

## DAGAALKII SOKEEYE

Markii ay dowladdii burburtay, waxaa caasimadda looga tagay hantidii guud ee ummadda. Qabaa'iladii dowladnimadu ka dhexaysay ayaa qabiil qabiil isu sii dagaalay, qabiil kastana wuxuu beegsaday deegaannadii ay reerahoodu asal ahaan ka soo jeedeen. Iyagoo ka faramaran hantidoodii, waxaa adkaatay in Soomaalidu dib isugu soo noqoto oo ay u dhisato dowlad ay wada leeyihiin.

Isku dayo iyo shirar badan oo ay ajnabi garwadeen ka ahaayeen ayaa lagu doonayey in dib la isugu keeno Soomaalidii kala tagtay, hase yeeshee laguma guulaysan. Waxaa sidoo kale samaysmay dadaallo ay bilaabeen aqoonyahanno Soomaaliyeed iyo ururro maxalli ah oo qayb ka qaatay bixinta adeegyada guud ee dalka, sida waxbarashada iyo caafimaadka.

Sidoo kale, waxaa bilowday maxkamado ay deegaannadu samaysteen oo qayb ka qaatay caddaalad-falka iyo ka hortagga fal-dambiyeedka. Awoodda hoggaanka dhaqanka ayaa aad u xoogaysatay, iyadoo inta badan buuxisay kaalintii dowladnimada. Hoggaamiye-kooxeedyadii bilaabay dagaalkii sokeeye ayaa iyaguna weli haystay awood, inkastoo markii dambe ay laftoodu burbureen. Waxaa kaloo jiray maxkamado Islaami ah oo xoojinayey ku dhaqanka shareecada, kuwaas oo qayb ka qaatay xallinta khilaafaadyada, gaar ahaan koonfurta dalka.

## SAAMAYNTII DAGAALLADII SOKEEYE IYO DHAXALKOODII

Dagaalladii sokeeye ee daba dheeraaday waxay Soomaaliya dhaxalsiiyeen burbur naf iyo maalba leh. Waxaa dhacay tacaddiyo iyo kala dambayn la'aan. Hase yeeshee, dhinaca kale waxaa jiray isku-dayo bulsho oo saamayn reebay, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen:

1. Soomaalidii ay dowladdii dhexe ka burburtay waxay nolol cusub ka samaysteen deegaannadii ay tageen, halkaas oo ay ka heleen degganaansho. Waxay deegaannadaas ku soo kordhiyeen farsamooyin iyo horumar, hanti cusubna way ka sameysteen. Waxay muujiyeen in nolol cusub la abuuri karo. Waxay dhiseen maamullo yaryar si ay u helaan ismaamul, caddaalad iyo kala dambayn, kuwaas oo markii dambe u xuubsiibtay dowlad-goboleedyada maanta jira. Waxay la qabsadeen nolosha cusub, waxayna dareemeen faa'iidada awood-daadejinta iyo gaarsiinta adeegyada deegaannada fogfog. Maamul-goboleed kasta waxaa laga hirgeliyey adeegyadii hore loogu aadi jiray dowladda dhexe, waxayna yeesheen dastuurro u gaar ah iyo madax la doorto. Waxaa la isla qaatay in la sameeyo laba heer oo dowladeed oo dastuurku kala xaddidayo awoodahooda.
2. Dalka waxaa ku dhacay maskax-guur, iyadoo aqoonyahanno iyo shacab badan ay u hayaameen dalal shisheeye. Taasi waxay keentay in Soomaalidii dibadda u haajirtay ay yeeshaan dhaqammo iyo afaf kala duwan, qaarkoodna ay la falgalaan diimaha dalalkii ay tageen.
3. Caddaaladdii ayaa daciiftay, taas oo keentay in aan la tixgelin ilaalinta shuruucda dalka, isla markaana madaxda dalka loo doortay ay ku dhiirradaan inay sameeyaan wixii ay doonaan.
4. Waxaa adkaatay in la xakameeyo waxa dalka laga dhoofinayo iyo waxa la keenayo, taas oo sababtay in dalka la keeno dawooyin dhacay, cunto dhacday, mukhaadaraad iyo hub sharci-darro ah.
5. Dowladaha labada heer waxay awoodi waayeen inay xakameeyaan dhaqan-guurka dhalinyarada iyo isticmaalka aaladaha qayb ka qaata faafinta anshax-xumada.
6. Dalka waxaa ka samaysmay xarakooyin diimeed oo ka soo horjeeda dowladda, kana dagaallama gudaha dalka.
7. Hoggaamiyeyaasha dalka marar badan uma hoggaansamaan dastuurka lagu heshiiyey, waxayna ku tagri-falaan awoodda. Taasi waxay keentaa in dhammaadka muddo-xileed kasta uu yimaado is-afgaranwaa siyaasadeed oo mararka qaar sababa dhiig daata.
8. Waxaa isku milmay hoggaankii dhaqanka iyo hoggaankii siyaasadda, taas oo keentay in la waayo meel lagu kala baxo marka uu yimaado is-afgaranwaa siyaasadeed.
9. Inkastoo dalka muddo dheer xor ahaa, haddana lama gaarin himilooyinkii laga filayey. Ciidankii qarankuna ma awoodin inuu daboolo baahida amniga, taas oo keentay in weli dalka ay joogaan ciidamo shisheeye oo kharash badan ku baxo, iyaguna aan si buuxda uga qayb qaadan xoraynta dalka.
10. Dowladda weli waxay si weyn ugu tiirsan tahay kaalmada dibadda, taas oo keentay in dalal shisheeye saamayn ku yeeshaan go'aannada dalka, isla markaana ay yaraato madax-bannaanida Soomaaliya.
11. Inkastoo Soomaaliya muddo dheer xor ahayd, haddana dhinacyo badan waxaa ka horumaray dalal xorriyadda qaatay xilli ka dambeeyey.
12. Khayraadka dabiiciga ah ee dalka, oo ku filnaan lahaa shacabka Soomaaliyeed, ayay dowladihii la doortay ku guuldarraysteen inay si hufan uga faa'iideeyaan. Taas beddelkeeda, khayraadkaas waxaa ka faa'iidaysta dalal shisheeye.

## AASAASKII MAAMULLADA GOBOLLADA

Si kastaba ha u dhismeen ama xilliyo kala duwan ha ku dhammaystirmeene, waxaa la dhisay shan ismaamul-goboleed iyo Dowladda Federaalka Soomaaliya. Hase yeeshee, weli waa xaqiiqo in nidaamka federaalka ee ay Soomaalidu wada qaadatay uusan si buuxda sal ugu yeelan dalka. Weli ma suurto gelin isfaham buuxa oo u dhexeeya labada heer ee dowladnimo, mana jirto isla oggolaansho dhammaystiran oo ku saabsan awoodaha la wada leeyahay, kuwa la kala leeyahay iyo dhammaystirka dastuurka guud oo ay labada heer isku waafaqsan yihiin.

Sidoo kale, dib u heshiisiin dhab ah oo ka dhex dhacda qabaa'ilka Soomaaliyeed weli waa qabyo. Dowladda dhexe weli waxaad mooddaa in hab-dhaqankeedu u eg yahay hab-dhaqankii dowladdii hore ee burburtay, iyadoo ay weli jirto faragelin maamul. Dhanka kale, caasimadaha dowlad-goboleedyaduna waxay u dhaqmaan sidii caasimaddii dowladda dhexe, maadaama awoodihii maamulka aan sidii loogu talagalay loo daadajin.

## GUULIHII LAGA GAARAY DHISMAHA DOWLADDA FEDERAALKA

Inkastoo ay weli jiraan khilaafyo siyaasadeed iyo caqabado hortaagan geeddi-socodka dowlad-dhiska, haddana Soomaaliya waxay gaartay horumar la taaban karo tan iyo markii la dhisay Dowladda Federaalka. Haddii aanay jiri lahayn khilaafaadka soo noqnoqday, waxaa suurtagal ahaan lahayd in la gaadho guulo intaas ka ballaaran. Si kastaba ha ahaatee, waxaa si weyn u dhammaystirmay qaab-dhismeedkii dowladnimo ee lagu saleeyay Dastuurka Ku-meelgaarka ah, iyadoo ay maanta jiraan dowladda federaalka, dowlad-goboleedyada xubnaha ka ah federaalka, iyo hay'adihii dastuurku qeexay.

Guulaha ugu waaweyn ee laga gaaray dowlad-dhiska labada heer ee dowladda waxaa ka mid ah:

1. Waxaa la dhammaystiray dadaalladii lagu dhisay dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada.
2. Waxaa la diyaariyey laguna heshiiyey Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Federaalka Soomaaliya sannadkii 2012.
3. Dowladda Federaalka waxay ka baxday xilligii ku-meelgaarka ahayd, iyadoo la dhisay hay'ado dastuuri ah oo rasmi ah.
4. Waxaa la dhammaystiray heerarkii kala duwanaa ee maamulka dowladeed iyo hay'adihii aasaasiga ahaa ee dowladda.
5. Dalka waxaa si isdaba joog ah u soo maray hoggaamiyeyaal kala dambeeyey, taasoo muujinaysa sii socoshada nidaamka dowladnimo iyo kala wareegga hoggaanka.
6. Waxaa la dhisay dowlad-goboleedyadii xubnaha ka noqday nidaamka federaalka, kuwaas oo kaalin muhiim ah ka qaatay maamulka iyo adeeg bixinta deegaannadooda.
7. Dowladda Federaalka iyo dowlad-goboleedyaduba waxay hirgeliyeen mashaariic horumarineed oo kala duwan, kuwaas oo wax ka qabtay kaabeyaasha dhaqaalaha, adeegyada bulshada, iyo dib-u-soo kabashada hay'adaha dowladda.

## MEELAHA AY DOWLADDA FEDERAALKA IYO DOWLAD-GOBOLEEDYADU KA GAABIYEEN

1. Dib-u-heshiisiintii Soomaalidii dagaallamay si dhab ah looma gelin, taas oo keentay in marar badan ay dib ugu soo noqnoqdaan dagaallo sokeeye oo u dhexeeya beelaha Soomaaliyeed.
2. Heshiis iyo wada-shaqayn dhab ah ma dhex marin dowladda dhexe iyo maamul-goboleedyada.
3. Lama isla oggolaan dastuurkii dowladda dhexe iyo dastuurrada maamul-goboleedyada.
4. Lama hirgelin awoodihii dastuuriga ahaa ee ku qeexnaa Dastuurka Ku-meelgaarka ah.
5. Heshiis dhammaystiran ma dhex marin dowladda dhexe iyo maamul-goboleedyada.
6. Lagama guurin nidaamkii xulashada qabiilka ku salaysnaa.
7. Dhammaan qabaa'ilka Soomaaliyeed ma helin ka-qaybgal maamul oo caddaalad ku dhisan.
8. Sal muggiis uma fariisan habraaca kala wareegga xilka marka ay dhammaato muddada xil-hayntu.
9. Lagama bogsoon khilaafaadka ka dhasha madaxtinimada iyo muddo-xileedka.
10. Heshiisyada dowladeed ma marin habraac wadaag ah oo u dhexeeya dowladda dhexe iyo maamul-goboleedyada.
11. Dowladda dhexe weli kama madax-bannana ciidamada caalamiga ah ee nabad-ilaalinta.
12. Lama dhisin ciidan federaal ah oo loo siman yahay kana hawlgala dalka oo dhan.
13. Ma kala cadda hawlaha ciidamada Federaalka iyo kuwa dowlad-goboleedyada, mana ku shaqeeyaan waajibaadka uu qeexayo nidaamka federaalka.
14. Dimuqraadiyad lagu wada heshiiyey weli kama hirgelin dalka guud ahaan

## TALO-SOOJEEDIN

1. In ku dhaqanka diinta Islaamku noqdo lama taabtaan, lana ixtiraamo.
2. In Soomaalidu cashar ka barato halgankii loo soo galay xorriyadda, isla markaana aan la dayicin qiimihii loo soo maray.
3. In Soomaalidu cashar ka barato mirihii dagaalladii sokeeye, lagana taxaddaro wax kasta oo dib loogu noqon karo.
4. In Soomaalidu cashar ka barato inaan la kala sarrayn, lana is maquunin karin.
5. In Soomaalidu cashar ka barato in dagaal kasta iyo dhiig kasta oo la daadiyo ay dawadiisa ugu dambaysaa tahay heshiis iyo isa saamax.
6. In madaxda wax hoggaamisa ay ku dhaqmaan caddaaladda iyo qiyamka diinta Islaamka, isla markaana aanay qabyaaladdu indha tirin.
7. In Soomaalidu u baahan tahay dib-u-heshiisiin dhab ah oo loo maro gobol-gobol, tuulo-tuulo, ceel iyo carshi, si looga gudbo madmadowga Soomaalida dhexdeeda ka dhashay, loona sameeyo shuruuc iyo goleyaal lagu xakameeyo khilaafaadka.
8. In shuruuc kasta oo Soomaaliya lagu dhaqayo ay noqdaan kuwo lagu heshiiyey oo loo dhan yahay.
9. In Soomaalidu ilaaliso heshiis kasta oo ay gaarto, kuna dhaqanto.
10. In la maxkamadeeyo masuul kasta oo gabood-fal ka gala dalka iyo dadka, mar kasta oo ay suurto gal noqoto.
11. In laga waantoobo xalaalaysiga dhiigga Muslimka, si qarsoodi ah iyo si muuqata intaba.
12. In dalku yeesho ciidan federaal ah oo loo siman yahay, kuna filan difaaca dalka, kana yimaada si siman maamulada dalka.
13. In Ciidanka Federaalka iyo ciidamada maamul-goboleedyadu kala soocnaadaan, awoodahoodana si cad loo kala xaddido.
14. In la soo afjaro khilaafka daba dheeraaday ee u dhexeeya dowladda dhexe iyo maamul-goboleedyada, awoodahooda dastuurigana la fuliyo lana ixtiraamo.
15. In sharci kasta iyo awood kasta oo dalka lagu dhaqayo, iyadoo Dastuurku saldhig u yahay, ay noqdaan kuwo ay heshiis ka gaaraan awoodaha jira (Dowladda Dhexe iyo Dowlad-goboleedyada), isla markaana aan awood gaar ahi ku tagri-falin.
16. In aqoonyahanka, culimada iyo guud ahaan bulshada rayidka ahi yeeshaan kaalin sharaf leh oo ay dowladda kula xisaabtamaan, talona ku siiyaan.
17. In dowladaha labada heer aysan dhiirrigelin fal-dambiyeedyada iyo mucaaradada sharci-darrada ah ee ka dhanka ah hay'adaha dowladda iyo kuwa aan dowliga ahayn.



**DHAN MISE DHIMMAN?**

# SIYAASADDA WAXBARASHADA PUNTLAND (QAYBTA 2-AAD)



Bashiir Suuley

**Xigashada Sawirka**: Wasaaradda Waxbarshada Puntland



Maqaalkii koowaad waxa aan uga hadalnay **Siyaasadda Waxbarashada Puntland (2024),** annaga oo falanqaynay himilooyinkeeda, qodobbada ay xoogga saartay iyo meelaha u baahan dib-u-eegis iyo xoojin. Waxa aan isla garwaaqsannay in ay siyaasaddu xambaarsan tahay aragti wanaagsan oo ku wajahan horumarinta waxbarashada; laakiin ay jiraan arrimo muhiim ah oo aan weli si buuxda uga muuqan ama u baahan faahfaahin iyo hirgelin dhab ah.

Qaybtan waxa aan diiradda ku saaraynaa - haddii Rabbi idmo - qodob ka mid ah kuwa ugu muhiimsan ee go'aamiya guusha ama guul-darrada nidaam kasta oo waxbarasho: macallinka! Macallinku waa halbowlaha aqoonta u beddela faham, xirfad iyo dhaqan uu ardaygu la baxo. Sidaas darteed, dood kasta oo ku saabsan tayada waxbarashadu waxay si dabiici ah uga bilaabataa tiirar ay kuwa ugu muhiimsan ka mid tahay tayada macallinku.

Waxaa jira oraah caan ah marka laga hadlayo muhiimadda macallinka ee waxabarshada taas oo ah: **"The quality of an education system cannot exceed the quality of its teachers."** (OECD, 2005).

Oraahdani waxa ay xambaarsan tahay farriin cad: tayada nidaamka waxbarasho ma dhaafi karto tayada macallimiintiisa. Si kasta oo loo casriyeeyo manhajka, loo dhiso dugsiyo qurux badan ama loo diyaariyo buugaag tayo sare leh, haddii macallinka fasalka jooga uusan lahayn aqoon, xirfad iyo tababar ku filan, himilooyinkaasi waxa ay ku ekaanayaan qoraal ku jira dukumentiyada siyaasadeed.

Daraasado ay sameeyeen khubaro ay ka mid yihiin John Hattie, Linda Darling-Hammond iyo hay'adda UNESCO waxay siyaabo kala madaxbannaan u muujiyeen in qodobka ugu saamaynta badan guusha ardayga uu yahay tayada macallinka.

## YAA MACALLIN DUGSI HOOSE KA NOQDA DUNIDA HORMARTAY?

Marka laga hadlayo waxbarashada, Finland waxaa si joogto ah loogu tilmaamaa mid ka mid ah tusaalaha ugu wanaagsan dunida oo dhan. Sirta guushoodu kuma jirto oo keliya manhaj wanaagsan ama dugsiyo casri ah; waxay ka bilaabataa cidda loo oggolaanayo in ay macallin noqoto.

Dalkan qofka doonaya inuu noqdo macallinka dugsiga hoose waxa uu marka hore maraa tartan adag oo lagu galo kulliyadaha waxbarashada, halkaas oo jaamacadaha qaarkood ay aqbalaan wax ka yar 10% codsadayaasha. Intaas kadib, qofkaas waxaa looga baahan yahay inuu dhammeeyo heerka labaad ee waxbarashada (Master).

Shuruuddu ma aha in qofku haysto shahaadada mastarka oo keliya; waa inuu haystaa Mastar ah kulliyadda waxbarshada, taas oo ka dhigan in uu bartay cilmiga waxbarashada, cilmi-nafsiga carruurta, hababka casriga ah ee waxbaridda, qiimaynta waxbarashada, naqshadaynta manhajka iyo cilmi-baarista waxbarashada. Waxaa intaas dheer tababarro muddo dheer soconaya oo lagu qaato dugsiyada tababbarka, iyadoo qofka la qiimeeyo ka hor inta aan loo oggolaan inuu si madax-bannaan fasal u hoggaamiyo.

Marka tan la barbar dhigo xaaladda ka jirta dalal badan oo soo koraya, waxaa muuqda farqi weyn. Xitaa qaar ka mid ah jaamacadaheenna iska daa dugsi hoose waxaa dhacda in koorsooyinka qaar ay dhigaan macallimiin haysta oo keliya shahaadada koowaad (Bachelor's Degree).

## XAQIIQADA KA JIRTA PUNTLAND

Intii aan ku jiray qoridda maqaalkaan waxa aan waraysiyo la yeeshay maamulayaal iyo barayaal dugsiyo hoose/dhexe oo Puntland ku yaalla. Mid ka mid ah maamulayaasha aan wareystay ayaa xaaladda ku sifeeyey sidan:

"Iskuulkeyga, inta badan macallimiinta wax ka dhigtaa waa dhallinyaro dhowaan ka baxay dugsiga sare oo bilaabay ama ku biiraya jaamacadda. Waxaa sidoo kale jira macallimiin weli aan jaamacad dhigan, balse ka qalin-jabiyey dugsiga sare, iyo kuwo ka yimid macaahidda. Xaaladdani kuma koobna iskuulkeenna oo keliya; waa mid si weyn uga jirta inta badan dugsiyada hoose iyo dhexe ee Puntland. Ilaa hadda ma jiro hab-raac ama halbeeg rasmi ah oo ay dugsiyadu ku saleeyaan shaqaalaysiinta macallimiinta. Dhibaatada kale ayaa ah in marka macallimiintaasi jaamacadda ka qalin-jabiyaan - waa intooda jaamacad aaddee - ay inta badan ka tagaan

waxbarashada iyaga oo raadsanaya shaqooyin kale oo mushahar fiican leh. Caqabadda ugu weyn ee nagu haysatana waa mushaharka macallimiinta dugsiyada hoose iyo dhexe oo aad u hooseeya, taas oo adkaynaysa in la helo lana sii hayo macallimiin tayo leh."

Hadalkaasi wuxuu si cad u muujinayaa in caqabadda jirtaa aysan ku koobnayn tayada macallinka oo keliya, balse ay ku lug leeyihiin mushaharka oo hooseeya, maqnaanshaha halbeeg qaran iyo shaqaalaha oo aan muddo dheer xirfadda ku sii nagaan.

Tani macnaheedu ma aha in macallimiinta maanta jooga aysan dadaal badan gelin waxbaridda carruurta. Xaqiiqadu waxay tahay in kumannaan macallin ay maalin kasta duruufo adag ku gudanayaan waajibaadkooda.

Dhanka kale waxa aan arkay intii aan baarista ku jiray iskuul inta badan macallimiinta dhigayaa yihiin kuwa ka baxay dugsi sare oo aan xataa jaamacad bilaabin. Halka iskuullada qaar ay ii sheegeen in ay jiraan hab-raacyo afka ah oo wasaaraddu la wadaagto oo loogu sheegayo in la raaco marka macallin la qaadanayo laakiin uusan jirin iskuul si sax ah u dhaqan-galiya.

## GUNAANAD

Ugu dambayn, carruurta Puntland waxay xaq u leeyihiin macallimiin lagu soo xulay aqoon, xirfad, karti iyo hufnaan. Horumarka waxbarashaduna kuma xirna oo keliya dhismaha fasallo cusub, diyaarinta manhaj casri ah ama dejinta siyaasado wanaagsan; waxa ugu muhiimsan waa tayada qofka maalin kasta fasalka hor istaagaya. Macallinku waa tiirka ugu weyn ee nidaamka waxbarashada, waana halka ay ka bilaabato tayada waxbarashada iyo mustaqbalka bulshada.

Sidaas darteed, haddii Puntland ay doonayso nidaam waxbarasho oo soo saara jiil aqoon leh, hal-abuur leh, kuna tartami kara heer gobol iyo heer caalami, waa in mudnaanta koowaad la siiyaa dib-u-habaynta habka lagu soo xulo, lagu tababaro, lagu qiimeeyo laguna horumariyo macallimiinta. Sidoo oo kale ugu yaraan waa in uu jiraa hal-beeg sax ah oo ay tahay in aan dhanna loo dhaafin marka ay joogto shaqaalaysiinta macallimiinta dugsiyada Puntland.



# QAADKU WAA MAANDOORIYE:

## CADDEYMAHA CILMIGA, MAMNUUCIDDA CAALAMIGA AH IYO ARAGTIDA SHAREECADA ISLAAMKA (QAYBTA 4-AAD)



Dr. Cabdinaasir Jaamac Warsame Islaam



## HORDHAC

Qaybtani waa qaybtii ugu dambaysay ee taxanihii "Qaadka iyo Dhibaatooyinkiisa", taxane isku dayay inuu dhinacyo kala duwan ka iftiimiyo saamaynta geedka qaadku ku leeyahay caafimaadka, dhaqaalaha, qoyska iyo bulshada. Intii lagu jiray qaybihii hore waxaa si gaar ah loo dul istaagay dhibaatooyinka caafimaad iyo kuwa bulsho ee qaadka, halka qaybtan ugu dambaysa ay isku dayayso inay ka jawaabto su'aasha ugu weyn ee doodda badan dhalisay muddo tobannaan sano ah: qaadku maandooriye ma yahay, maxaase sababay in dalal badan ay mamnuucaan, maxaase shareecada Islaamku ka qabtaa?

Muddo dheer dadka qaar waxay ku doodayeen in qaadku yahay geed dabiici ah oo aan lagu qiyaasi karin khamriga iyo maandooriyeyaasha kale, halka kuwo kalena ay ku doodayeen in saameyntiisa caafimaad iyo tan maskaxeed ay ka dhigayaan qayb ka mid ah mukhaadaraadka casriga ah. Maanta dooddaasi waxay leedahay jawaabo badan oo ka yimid shaybaarrada caafimaadka, ururrada caalamiga ah, sharciyada dowladaha iyo golayaasha fatwada Islaamka.

## CADDEYMAHA SAYNISKA EE MUUJINAYA IN QAADKU YAHAY MAANDOORIYE

Baaritaannada lagu sameeyay geedka qaadka waxay soo bilowdeen dhammaadkii qarnigii sagaal iyo tobnaad, markii saynisyahannadii Flückiger iyo Gerock ay sanadkii 1887 ogaadeen in caleemaha qaadku ay ka kooban yihiin walax firfircoon oo loo bixiyay Cathine. Helitaanka walaxdan ayaa furay albaabkii cilmi-baarisyo badan oo lagu sameeyay geedka iyo saamayntiisa caafimaad.

Balse daahfurkii ugu muhiimsanaa wuxuu dhacay sanadkii 1974 markii cilmi-baaris ballaaran oo ay maalgelisay Qaramada Midoobay lagu ogaaday walax kale oo ka awood badan Cathine oo loo bixiyay Cathinone. Walaxdan ayaa noqotay sababta ugu weyn ee khubarada caafimaadku ugu aqoonsadeen qaadka inuu yahay maandooriye saameeya habdhiska dareenwadka dhexe ee bini'aadamka.

Cathinone-ka ku jira qaadku wuxuu qaab-dhismeed kiimiko ahaan aad ugu dhow yahay walxaha loo yaqaan Amphetamine, Methamphetamine iyo Ephedrine, kuwaas oo ka mid ah maandooriyeyaasha ugu caansan dunida. Sida amphetamine-ku u kiciyo habdhiska neerfaha, u yareeyo hurdada iyo daalka isla markaana u kordhiyo garaaca wadnaha iyo dhiig-karka, ayay Cathinone-du u samaysaa dadka isticmaala qaadka.

Cilmi-baarisyada caafimaadku waxay muujiyeen in qaadku sababo hurdo la'aan, cunto xumo, af qallayl, walwal, garaaca wadnaha oo kordha, dhiig-kar, niyad-jab, xanuunno la xiriira habdhiska dheefshiidka iyo mararka qaar xaalado maskaxeed oo ay ka mid yihiin welwelka daran iyo dhalanteedka. Saamayntani waa kuwa si weyn ugu dhow saamaynta amphetamine-ka iyo maandooriyeyaasha kale ee neerfayaasha kiciya.

Xoogga walxaha Cathine iyo Cathinone ee ku jira qaadka wuxuu ku kala duwan yahay nooca geedka, ciidda uu ka baxo, cimilada, da'da geedka, waqtiga la goosto iyo deegaanka uu ka soo jeedo. Tusaale ahaan nooca qaadka ee Yemen ka baxa ee loo yaqaan "Al-Nabhi" ayaa lagu ogaaday inuu leeyahay heerar sare oo walxahaas ah marka loo eego noocyo kale.

Sababtaas awgeed Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO) iyo khubarada mukhaadaraadka ayaa qaadka ku daray qaybaha maandooriyeyaasha saameeya habdhiska dareenwadka dhexe. Kala soociddii ay khubarada WHO sameeyeen sanadkii 1965 waxaa qaadku uu ka galay qayb gaar ah oo loo bixiyay Khat Type, taas oo muujinaysa in aan loo arkin caleen caadi ah balse loo aqoonsaday walax maandooriye leh oo leh astaamo iyo saameyn gaar ah.

## DALALKII MAMNUUCAY QAADKA IYO SABABAHA MAMNUUCIDDA

Markii ay soo bateen caddeymaha caafimaad iyo kuwa amni ee la xiriira qaadka, dalal badan ayaa bilaabay inay mamnuucaan ama si adag u xaddidaan isticmaalka iyo ganacsigiisa.

Masar waxay ka mid ahayd dalalkii ugu horreeyay ee si firfircoon uga qayb qaatay dadaallada caalamiga ah ee lagula dagaallamayay qaadka, iyadoo door weyn ku lahayd doodihii Guddiga Qaramada Midoobay ee Maandooriyeyaasha sanadihii kontomaadkii. Sacuudi Carabiya ayaa sidoo kale si rasmi ah u mamnuucday qaadka iyadoo ku salaynaysa waxyeelladiisa caafimaad iyo midda bulshada.

Dalalka sida Sweden, Norway, Denmark iyo Canada ayaa iyaguna ku daray qaadka ama walxaha ku jira liiska maandooriyeyaasha mamnuuca ah. Dowladda Sweden ayaa sanadkii 1989 si rasmi ah u mamnuucday qaadka kadib markii daraasado

caafimaad iyo amni ay muujyeen saameyntiisa bulshada soo galootiga ah iyo xiriirka uu la leeyahay walxaha amphetamine-ka la midka ah.

Maraykanka ayaa isaguna qaaday tallaabooyin adag oo ka dhan ah qaadka. Inkasta oo sharciyada gobolladu mararka qaarkood kala duwanaayeen, haddana dowladda federaalku waxay si rasmi ah u xaddiday walxaha Cathine iyo Cathinone ee ku jira qaadka iyadoo ku dartay walxaha la kontoroolo ee federaalka. Taasi waxay si dhab ah uga dhigtay qaadka walax sharci ahaan mamnuuc ah.

Hay'adaha kastamka iyo ammaanka ee Maraykanku waxay diyaariyeen hagayaal iyo buugaag gaar ah oo lagu tababarayo saraakiisha kastamka iyo booliiska si ay u aqoonsadaan qaadka iyo hababka loo tahriibiyo. Garoomada diyaaradaha sida Dulles International Airport ayaa marar badan lagu qabtay xaddi badan oo qaad ah oo dalka la gelinayay.

Magaalooyinka sida New York, Washington DC, Los Angeles, Boston, Dallas, Virginia iyo Detroit ayaa muddo dheer ka mid ahaa meelaha ugu waaweyn ee lagu qabto qaadka la tahriibinayo. Sababaha ugu waaweyn ee dowladahaasi u mamnuuceenna waxay ahaayeen saamaynta caafimaadka, saameynta dhaqaale, la dagaallanka maandooriyaha iyo ilaalinta amniga bulshada.

## ARAGTIDA SHAREECADA ISLAAMKA EE QAADKA

Marka laga yimaado doodaha caafimaadka iyo kuwa sharci ee casriga ah, shareecada Islaamku waxay leedahay mabda' guud oo mamnuucaya wax kasta oo waxyeello gaarsiinaya qofka iyo bulshada. Ujeeddada ugu weyn ee shareecadu waa ilaalinta waxa culimadu ugu yeereen daruuriyaadka shanta ah ama lixda ah: diinta, nafta, caqliga, nasabka, maalka iyo cirdiga.

Qaadku wuxuu si toos ah ama si dadban u dhaawacaa dhammaan qodobadan.

Wuxuu dhaawacaa diinta marka uu qofka ka mashquuliyo salaadda iyo cibaadada, ama uu ku bixiyo hanti lagu bixin lahaa sako iyo khayr. Wuxuu dhaawacaa nafta iyo caafimaadka isagoo sabab u noqda cudurro iyo dhibaatooyin caafimaad oo badan. Wuxuu dhaawacaa caqliga maadaama Cathinone-ku uu si toos ah u saameeyo habdhiska dareenwadka dhexe iyo awoodda qofka ee xakamaynta naftiisa iyo go'aan qaadashadiisa.

Sidoo kale wuxuu dhaawacaa nasabka iyo qoyska isagoo sabab dayac qoys, khilaafyo iyo burbur dhaqaale. Wuxuu dhaawacaa maalka iyadoo malaayiin doollar oo wax soo saar abuuri lahaa lagu bixiyo caleen aan dhaqaale soo celin lahayn. Ugu dambayn wuxuu dhaawacaa cirdiga iyo sharafta iyadoo fadhiyada qaadka ay mararka qaar noqdaan goobaha xan, qadaf iyo aflagaaddo lagu faafiyo.

Sababta ugu weyn ee khamriga loo mamnuucayna waxay ahayd ilaalinta caqliga. Rasuulka wuxuu yiri: "Wax kasta oo wax sakhriya waa khamri, khamri kastana waa xaaraan." Culimada badankoodu waxay ka fahmeen in xukunkani aanu ku koobnayn wax la cabo oo keliya, balse uu quseeyo wax kasta oo daboola ama waxyeelleeya caqliga iyo miyirka.

Marka la adeegsado qiyaasta shareecada, khamrigu wuxuu noqdaa asalka, qaadkuna wuxuu noqdaa faraca la qiyaasayo. Cilladda ay wadaagaan waa saamaynta ay ku leeyihiin maskaxda iyo habdhiska dareenka. Sidaas darteed culimo badan ayaa ku xukumay in qaadku qaato isla xukunkii khamriga.

## FATWOOYINKA IYO GO'AAMADA RASMIGA AH EE MAMNUUCAYA QAADKA

Aragtida ah in qaadku yahay xaaraan ma aha oo keliya aragti ay qabaan culimo gaar ahi, balse waxaa taageeray golayaal iyo hay'ado fatwo oo rasmi ah oo ka jira dunida Islaamka.

Guddiga Joogtada ah ee Cilmi-baarista iyo Fatwada ee Sacuudi Carabiya (اللجنة الدائمة للبحوث العلمية والإفتاء) ayaa soo saaray Fatwooyinka lambaradoodu yihiin 16097 iyo 13241, kuwaas oo si cad u sheegay in qaadku yahay xaaraan maadaama uu yahay mukhaddir daciifiya jirka, khasaariya maalka, dadka ka mashquuliya salaadda isla markaana sababa dhibaatooyin caafimaad iyo bulsho.

Golaha Culimada Waaweyn ee Sacuudi Carabiya (هيئة كبار العلماء) ayaa isaguna soo saaray Go'aanka Lambar 138 ee taariikhdiisu ahayd 20/06/1407 Hijriyada, kaas oo si cad u sheegay

in qaadku uu ku jiro xukunka mukhaadaraadka maadaama uu waxyeelleeyo daruuriyaadka ay shareecadu ilaaliso.

Shirweynihii Caalamiga ahaa ee Islaamka ee La-dagaallanka Maandooriyaha iyo Khamriga ee lagu qabtay magaalada Madiina sanadkii 1402 Hijriyada ayaa isaguna soo saaray talooyin si cad ugu daraya qaadka liiska maandooriyeyaasha xaaraanta ah ee la midka ah xashiishka iyo mukhaadaraadka kale.

Sidoo kale Machadka Cilmi-baarista Islaamka ee Al-Azhar (مجمع البحوث الإسلامية) ayaa sanadkii 2012 soo saaray fatwo guud oo caddeynaysa in qaadku yahay xaaraan, iyagoo ku saleeyay qawaacidda guud ee shareecada ee mamnuucaya wax kasta oo waxyeello u geysta caafimaadka, maalka iyo bulshada.

Gunaanad

Marka la isku geeyo natiijooyinka cilmi-baarista caafimaadka, xaqiiqooyinka kiimikada ee ku saabsan Cathinone iyo Cathine, go'aamada hay'adaha caalamiga ah, sharciyada dalalka badan iyo fatwooyinka golayaasha waaweyn ee Islaamka, waxaa muuqata in qaadku aanu ahayn arrin ku kooban dhaqan ama madadaalo bulsho, balse uu yahay maandooriye leh saameyn caafimaad, dhaqaale iyo mid bulsho oo baaxad leh.

Waxa uu dhaawacayaa diinta, nafta, caqliga, nasabka, maalka iyo cirdiga; waana sababta ay culimo badan, dowlado badan iyo hay'ado caafimaad oo caalami ahi ugu midoobeen aragtida ah in qaadku uu ka mid yahay mukhaadaraadka ay tahay in laga ilaaliyo qofka iyo bulshada.

**W/Q:** Dr. Cabdinaasir J. Warsame Islaam



# SOOMAALIYA 66 SANO KADIB:
# GUUL MISE GUULDARRO?



Dr. Maxamuud C/Raxmaan Maxamuud



Xigashada Sawirka: AI

# HORDHAC

Sannad kasta waxaa looga dabaaldegaa meel kasta oo Soomaali joogto, dal iyo dibadba, sanadguuradii xorriyadda marka la gaaro 1-da Luulyo. In Soomaaliya ka xorowdo gumaystayaashii qabsaday dhulkeeda dhammaadkii qarnigii 19-aad, gaar ahaan Ingiriiska iyo Talyaaniga, oo kala gumaysanayey Waqooyiga iyo Koonfurta Soomaaliya, waxay ahayd riyo rumowday oo muddo dheer ay u dagaallamayeen halgamayaal Soomaaliyeed oo mid walba meel soo gaarsiiyey halgankii gobannimo-doonka. Soomaalidu waxay ku naaloonaysay inay hesho dawladnimo u adeegta danaha shacabkeeda, difaacda xuduudaheeda, horumarisa nidaamkeeda dhaqan-dhaqaale, abuurtana degganaansho siyaasadeed, isla markaana kaalin wax-ku-ool ah ka gasha Afrika iyo dunida inteeda kale. Waxaa xusid gaar ah mudan in ujeeddada gobannimo-doonku ahayd xoraynta gobollada kala duwan ee gumaystuhu haystay, waxaase muuqata in uusan jirin qorshe ka sii fog oo ku jihaysan nooca dawladnimada la rabo (Governance Model) iyo tallaabada ku xigta toona.

Isla xilligaas ay Soomaaliya xoroowday, waxaa xornimadooda helay waddamo badan oo ka tirsan Afrika. Dhammaan waddamadaas waxaa ku noolaa qowmiyado kala diin, kala luuqad iyo kala dhaqan ah. Soomaaliya waxay kaga duwanaayd in bulshadeedu isku midab, isku diin iyo isku luuqad ahayd, isla markaana ay u dhammaystirnayd wax kasta oo midayn kara ummad kana xoojin kara wadajirkeeda.

Su'aasha maanta ka guuxaysa qaybaha kala duwan ee bulshada ayaa ah: maxaa ka rumoobay riyadii lagu naaloonayey xilligii lagu jiray halgankii gobannimo-doonka? Xaggee ayay Soomaaliya ku dambaysay 66 sano ka dib markii ay qaadatay xornimada 1-da Luulyo 1960?

Waxaa aad u adag in la qeexo ama hoosta laga xarriiqo xaaladda dawladnimo ee Soomaaliya maanta. Burburkii dawladdii dhexe ee 1991-kii ka dib, dalku wuxuu galay xaalad dagaal sokeeye iyo burbur baahsan oo socday muddo ku dhow toban sano, ilaa sannadkii 2000, markaas oo Jabuuti lagu soo yagleelay Jamhuuriyaddii Saddexaad, taas oo maanta ku jirta marxalad kala-guur ah oo halis gelin karta jiritaankeeda. Dawladnimada Soomaaliya waxay ku jirtaa xaalad uu dhisan yahay haykalkii dawladnimo, balse aan lahayn ruuxdii iyo waxtarkii laga filayey; waa xaalad u dhexaysa fashil iyo jiritaan, xaalad lagu tilmaami karo in uu jiro nidaam dawladnimo oo dhisan, hase yeeshee aan si buuxda u shaqayn ama u bixin adeegyadii ay dawladdu bixin jirtay.

Lixdan iyo lix sano ka dib xornimadii, jiritaanka dawladnimada Soomaaliya wuxuu weli ku tiirsan yahay joogitaanka ciidamo shisheeye oo suga amniga iyo ilaalinta kaabayaasha ugu muhiimsan ee dawladda, sida garoonka diyaaradaha iyo madaxtooyada.

Isdiiddooyinka nololeed ee xaaladda Soomaaliya waxaa lagu soo koobi karaa laba arrimood: shacabka oo muujiyey adkaysi aan caadi ahayn, kana soo samatabaxay burbur iyo qalalaase siyaasadeed oo daba dheeraaday; iyo nidaamka dawladnimo oo ku fashilmay inuu dhiso hay'ado u taagan dawladnimada, si hufanna ugu adeega bulshada.

Shacabka Soomaaliyeed waxay soo mareen 10-kii sano ee ugu horreeyey xorriyadda ka dib nidaam u muuqday dimuqraadiyad ay hadheeyeen qabyaalad iyo kala qaybsanaan siyaasadeed; 21 sano oo uu talada hayey nidaam hantiwadaag, millatari iyo keli-talis ah; 10 sano oo dagaal sokeeye oo aan waxba reebin; iyo 25 sano oo uu jiray nidaam dawladnimo oo maqaarsaar ah, kaas oo aan weli si dhab ah uga hawlgelin waaqica dalka, kuna dhisan siyaasad qoqob iyo qabiil is huwan.

## XORNIMADA IYO BAR-BILOWGA DAWLADNIMO

Gumaysigii ka hor, deegaannada Soomaalida kama jirin nidaam dawladnimo oo la mid ah kan maanta loo yaqaan. Waxaase jiray meelo ka mid ah deegaannada Soomaalida oo ay gaareen nidaamyadii Wilaayaadka Islaamiga ah, sida Ifaat, oo ka hanaqaaday Harar iyo Saylac. Waxaa sidoo kale jiray qabaa'il lahaa nidaamyo dhaqameed lagu maamulo laguna kala baxo.

Nidaamka dawladnimada casriga ah (Modern Statehood and Governance Model) waa nidaam laga dhaxlay gumaystihii, kuna dhisan mabda'a qaran madaxbannaan (National Sovereignty), leh xuduudo si cad u qeexan (Defined Territorial Borders) iyo ku-dhaqanka sharciga (Rule of Law). Nidaamkan, qaabkiisa casriga ah, hore ugama jirin deegaannada Soomaaliyeed, bulshaduna aqoon iyo waayo-aragnimo durugsan uma lahayn.

Helitaanka xorriyaddu ma suurtagelin dawladnimo buuxda; balse waxay ahayd bar-bilow laga ambaqaado si loo dhiso nidaam dawladnimo waara, taabba-gal ah, kuna dhisan danta iyo diinta bulshada, una adeega dalka iyo dadka Soomaaliyeed. Xorriyaddu ma dhisin hay'ado dawladeed (Institutions) oo xooggan, dhaqan

awood-qaybsi oo suubban (democratic tradition), ama faham sax ah oo laga haysto nidaamka siyaasadeed ee lagu hagayo qaranka.

Midowgii labada gobol ee Koonfurta iyo Waqooyiga wuxuu ahaa arrin ay dhammaan Soomaalidu u riyaaqeen, kana muuqatay waddaniyad iyo daljacayl. Hase yeeshee, waxay ahaayeen laba gobol oo hab-dhaqankooda siyaasadeed iyo fahamkooda dawladnimo uu saldhig u ahaa laba gumayste oo kala dhaqan duwan, kana kala tegay laba nidaam-dawladnimo oo aad u kala duwan, gaar ahaan dhinacyada qaanuunka, is-maamulka, maaraynta arrimaha siyaasadda, iyo sida loola dhaqmo bulshada iyo bixinta adeegyadeeda.

Kala duwanaanshahaas si weyn looguma baraarugsanayn bilowgii midowga, taas oo ay sabab u ahayd xamaasaddii Soomaalinimada, farxaddii laga qaaday xorriyadda la helay, iyo rajadii laga qabay in la xoreeyo gobolladii Soomaaliyeed ee weli maqnaa. Waxaa intaas barbar socday in noloshii dhaqameed ee soo jireenka ahayd ay inteeda badan ku salaysnayd maaraynta nolol-maalmeedka bulshada, sida sugidda amniga, xaqiijinta caddaaladda, iyo kobcinta iskaashiga bulshada.

Madaxdii cusbayd ee dalka hoggaanka u qabatay, halkii ay adeegyadii noloshii dhaqanka u wareejin lahaayeen adeegyo ay dawladdu qabato, dadkana u bari lahaayeen faa'iidada dawladnimada iyo in ay u dhalatay inay noqoto hay'adda u taagan danta guud, u adeegidda bulshada, xaqiijinta caddaaladda, la dagaallanka dulmiga, iyo horumarinta aqoonta iyo xirfadaha, halkii ay bulshada u jihayn lahaayeen in laga guuro noloshii dhaqanka ee xooggeedu ku dhisnaa reer-guuraanimada iyo "yaa tolooy", waxay doorteen in noloshii dhaqanka ay u adeegsadaan sidii ay ugu taagnaan lahaayeen uguna fushan lahaayeen danahooda gaarka ah ee siyaasadeed ama ugu heli lahaayeen kuraas.

Waxay sii xoojiyeen qabyaaladdii, waxaana meesha ka baxay hammigii ay bulshadu ka lahayd dawladnimada. Sidoo kale, waxaa lumay fahamkii saxda ahaa ee la rabay in laga qaato qarannimada iyo dawladnimada. Natiijadii waxay noqotay in ay dhismaan hay'ado dawladeed oo ay hareeyeen nin-jeclaysi, qabyaalad iyo loollan awoodeed (power struggle).

Muddo ka yar sagaal sano gudahood, waxaa soo ifbaxday sawir aan qurux badnayn oo ka tarjumaya nooca dawladnimada laga dhaxlay gumaystihii, taas oo ugu dambayn sababtay in la dilo madaxweynihii dalka, isla markaana ay ciidamadu la wareegaan talada dalka.

## DHALASHADA IYO DHIMASHADA DAWLAD DHEXE OO XOOGGAN

Inqilaabkii milatariga ee 1969-kii wuxuu bilowgiiba suurtageliyey in nidaamkii u ekaa dimuqraadiyadda, balse ay hadhaysay qabyaaladdu, ee ay bulshada Soomaaliyeed la kulmeen xorriyaddii ka dib, lagu beddelo nidaam adag oo ku dhisan midnimo qaran. Wuxuu hirgeliyey kacaan uu ku tilmaamay hantiwadaag cilmi ku dhisan (Scientific Socialism), isagoo gacan bir ah ku qabtay awooddii fulinta, qorshaynta iyo maamulka dhammaan mashaariicdii iyo hawlihii horumarineed ee dalka ka socday.

Sanadihii u horreeyey, waxqabadka kacaanku wuxuu noqday mid si weyn loo dareemay. Wuxuu hirgeliyey qorista af Soomaaliga, wuxuu la dagaallamay qabyaaladdii, wuxuuna dhisay kaabayaal dhaqaale sida warshado. Muddo yar ka dib, Soomaaliya waxay u muuqatay inay tahay dawlad aad uga xooggan dawladaha kale ee Geeska Afrika. Hase yeeshee, haykalkii guud ee u ekaa dawlad xooggan waxaa hoostiisa ka socday bolol iyo burbur ku dhacay hay'adaha dawladda iyo adeegyada bulshada. Awooddii xukunka waxay ku ururtay tiro kooban, waxaana meesha ka baxay hay'adihii madaxbannaan, halka uu daciifay ama gebi ahaanba joogsaday isla-xisaabtankii bulshada. U hoggaansanaanta kacaanka iyo daacadnimada loo muujiyo (loyalty) ayaa beddelay kartidii iyo aqoontii qofka (competence) ee lagu qiimayn jiray qabashada jago ama helitaanka fursad shaqo.

Muddo aan ka badnayn toban sano gudahood, nidaamkii kacaanka ee ku dhisnaa cududda milatariga wuxuu bilaabay inuu taag-darreeyo, inkasta oo qayb ahaan loo aanayn karo dagaalkii qaraaraa ee 1977–1978 lagu qaaday Itoobiya si loo xoreeyo Soomaali Galbeed. Muddadii ka dambaysay 1980-kii, nidaamkii kacaanka iyo keli-talisnimadii xukunka milatarigu waxay la kulmeen kacdoonno hubaysan oo saldhiggoodu ahaa Itoobiya. Taasina waxay bilow u noqotay hoos-u-dhacii nidaamka, iyadoo uu galay xaalad uu ku mashquulay is-badbaadin iyo sidii uu xukunka u sii haysan lahaa, ilaa ugu dambayn uu burburay sannadkii 1991-kii.

## NIDAAMKA FEDERALKA IYO DIB-U-DHISKA DAWLADNIMADA

Toban sano oo lagu jiray dagaal sokeeye, qax, barakac baahsan, iyo in reer walba dib ugu noqdo deegaannadii uu ka soo jeeday ka dib, hoggaamiyeyaasha

siyaasadda Soomaaliyeed waxay ku heshiiyeen in dawladnimadu dib ugu soo noqon karto nidaam federaal ah oo ku dhisan awood-qaybsi, xukun-daadejin, iyo dhismaha dawlad-goboleedyo ismaamul leh. Ujeeddadu waxay ahayd in laga gudbo nidaamkii dawlad dhexe ee awoodda badan, lana abuuro hannaan dib u soo celin kara wadajirka iyo dawladnimada Soomaaliya. Waxaa la rumaysnaa in awood-qaybsiga ku dhisan beelaha (4.5 model) uu horseedi karo dawlad ay dhammaan bulshada Soomaaliyeed wada leeyihiin.

Qaadashada nidaamka federaalka ku dhisan, inkasta oo uu suurtageliyey dib u soo noqoshada nidaamkii dawladnimo laguna soo dhisay Jamhuuriyaddii Saddexaad tan iyo markii dib loo yagleelay, haddana waxaa caddaatay inay aad u adkaatay in loo dhaqan geliyo sidii loogu talagalay. Weli la iskuma raacsana nooca dastuurka iyo sida loo dhammaystirayo. Weli la iskuma raacsana sida ay dawladda dhexe iyo dawlad-goboleedyadu u qaybsanayaan awoodaha, deeqaha caalamiga ah iyo khayraadka. Weli la iskuma raacsana nooca doorasho ee lagu soo dhisayo baarlamaanka iyo jagooyinka ugu sarreeya ee dowladda. Sidoo kale, weli ma jirto Maxkamad Dastuuri ah oo kala saarta khilaafaadka ka dhex dhasha madaxda sare ee dalka ama u dhexeeya dawladda dhexe iyo dawlad-goboleedyada.

Mugdiga iyo khilaafaadka hareeyey dhaqangelinta nidaamka federaalka ayaa sababay in laga mashquulo dhisidda hay'ado dawladnimo oo taabba-gal ah iyo u adeegidda bulshada si caddaalad iyo sinaan leh. Waxaa muuqata in nidaamka federaalku noqday malab iyo murre isku milan: wuxuu noqday, dhinac, xalkii dib u dhiska dawladnimada, dhinaca kalena isha ugu weyn ee khilaafaadka siyaasadeed iyo murannada awood-qaybsiga. Dhaqangelinta nidaamka federaalka waxay ku xiran tahay is-aaminaad siyaasadeed oo ka badan inta ay ku xiran tahay waxa ku qoran dastuurka, maadaama qodobada dastuurka, marka la doono, si fudud loo beddeli karo ama loo garab mari karo.

Shalay iyo maanta waxaa isu eg, oo aan la inkiri karin, saamaynta beelnimada loogu adeegsanayo helitaanka awood siyaasadeed. Arrintani waxay dib u xasuusinaysaa bulshada hab-dhaqankii siyaasadeed ee 10-kii sano ee ugu horreeyey xornimada ka dib. Mushkiladdu ma aha jiritaanka beelaha iyo odayaasha dhaqanka. Intii ay Soomaalidu jirtay, bulshada waxay ku dhisnayd nidaamka dhaqanka iyo kaalinta odayaasha dhaqanka ee nabadaynta iyo xalinta khilaafaadka. Mushkiladdu waxay timaaddaa marka hay'adaha dawladda iyo nidaamka dhaqanku isku milmaan, awooddana lagu qaybsado hab aan caddaalad ku dhisnayn, lagana waayo sinnaanta adeegyada dawladda. Sidoo kale, mushkiladdu waxay timaaddaa marka dadku wax ku qiimeeyaan metelaadda beeleed iyo "yaa inoo jooga", halkii ay waxqabadka dawladdu ku qiimayn lahaayeen adeeg hufan iyo karti shaqo oo ku dhisan aqoon iyo xirfad.

Fahamka laga haysto dawladnimada ayaa marar badan noqday in laga macaasho ama laga cooto hay'adaha dawladda, halkii ay ujeeddadoodu ahaan lahayd u adeegidda bulshada. Taasi waa sababta ay u adkaatay in laga gudbo wax-qaybsiga ku salaysan qabiilka. Reer walba wuxuu doonayaa inuu metelaad ku yeesho hay'adaha dawladda si aanu u lumin fursadaha shaqo, hantida iyo awoodda uu ku heli karo tartanka ama loollanka jagooyinka sare iyo wasaaradaha loo arko inay "dhadhan" leeyihiin. Su'aashu waxay tahay: ma loo baahan yahay in laga guuro dhaqanka nololeed ee Soomaalida u ahaa soo jireenka boqollaalka sano, mise waxaa la oran karaa jiritaanka qabiilka ayaa caqabad ku ah hirgelinta nidaam dawladnimo? Xaqiiqadu waxay tahay in jiritaanka dhaqanka nololeedku uusan caqabad dhab ah noqonayn haddii si habboon loo jiheeyo looguna adeegsado nabadaynta, midaynta iyo xoojinta wadajirka bulshada. Waxaase muhiim ah in waddaniyaddu ka horreyso beelnimada marka go'aanno laga gaarayo arrimaha khuseeya danta guud iyo adeegyada bulshada. Sidoo kale, waxaa lama huraan ah in bulshada aysan ku kala duwanaan xuquuqda iyo helitaanka fursadaha awoodda iyadoo lagu salaynayo haybta ama beesha ay ka dhasheen.

## DIMOQRAADIYAD MARAN

Intii dib loo yagleelay dhismaha dawladnimada, ama Jamhuuriyaddii Saddexaad, waxaa la soo dhisay xukuumado badan, waxaana la qabtay doorashooyin dadban oo lagu soo doorto golayaasha baarlamaanka iyo madaxda sare ee dalka. Hase yeeshee, nidaamka dimuqraaddigu ma aha doorasho oo keliya. Wuxuu ku dhisan yahay hay'ado saldhig u ah dawladnimada iyo xukun waara, sida maxkamado awood leh,

xisbiyo siyaasadeed oo xooggan, warbaahin xor ah, iyo ixtiraamka dastuurka. Siyaasadda Soomaaliya waxay inta badan ku dul meersan tahay shakhsiyaadka is sharraxaya, beesha ay ka dhasheen, taageerada ay ka helaan dawlado shisheeye, iyo dhaqaalaha ay haystaan. Siyaasaddu kuma dhisna barnaamijyo siyaasadeed ama qorshayaal cad oo lagu horumarinayo dalka laguna adeegayo bulshada. Ugu dambayn, siyaasaddu waxay ku soo ururtay koox yar oo hore u soo haysay talada dalka, kuwaas oo aan ka tegin waxqabad muuqda ama horumar la taaban karo. Dhanka kale, bulshada inteeda badan mudnaanta ma siiso in hoggaamiyuhu wax u qabto shacabka, uu ilaaliyo hantida guud, ama uusan ku takrifalin awoodda xafiiska. Waxa ugu weyn ee ay danaynayaan waa beesha uu ka soo jeedo iyo nooca kuraasta ay beeshoodu ka hesho nidaamka siyaasadeed.

## DHIBAATADA HOGGAANKA SIYAASADEED

In kasta oo dawladnimada Soomaaliya ay weli xasillooni la'dahay sababo la xiriira caqabado waaweyn oo horyaalla, sida ismariwaaga dastuurka, maqnaanshaha Maxkamad Dastuuri ah oo madax-bannaan, daciifnimada hay'adaha danta guud, amni darrada, iyo khatarta argagixisada, kuwaas oo dhammaantood curyaaminaya dib u dhiska hannaan dawladnimo oo taabba-gal ah, haddana waxaa la oran karaa caqabadda ay ku ururayaan dhammaan caqabadahaasi waa hab-dhaqanka siyaasadeed (Political Culture) ee hareeyey nidaamka dawladnimo 25-kii sano ee u dambeeyey.

Gelitaanka siyaasadda waxaa inta badan laga fahamsan yahay inay tahay tartan loogu jiro xafiis iyo kursi, halkii ay ka ahaan lahayd tartan lagu qaadayo mas'uuliyadda hirgelinta isbeddel qaran, horumar iyo adeeg bulsho. Qiimaynta hoggaaminta waa inay ku salaysnaataa raadka ay ka tagtay, saamaynta ay ku yeelatay nolosha bulshada, iyo sida ay u dhistay ama u horumarisay hay'adaha adeegga bulshada. Dawladdu xoog iyo horumar kuma gaarto hoggaamiye awood badan oo keliya. Waddamadu waxay ku horumaraan, awoodna ku yeeshaan, sida ay u xooggan yihiin hay'adaha danta guud iyo kuwa adeegga bulshada, sida waxbarashada, caddaaladda, shaqo-abuurka, isku-xirka bulshada, sugidda amniga, abuuridda fursadaha, iyo ixtiraamka xeerarka iyo shuruucda dalka u yaalla.

Soomaaliya maanta uma baahna ictiraaf ama aqoonsi caalami ah. Waxa ay la daalaa-dhacaysaa waa sharciyadda iyo sharciyeynta hay'adaha dawladda, kalsoonida ay bulshadu ku qabto, iyo tayada adeegyada ay bixiyaan. Waxay u hamuuman tahay qaan-gaadhnimo dastuuri ah, isla-xisaabtan ka dhexeeya heerarka kala duwan ee dawladda, isbeddel dhaqaale, iyo xoojinta muwaadinnimada. Sidoo kale, waxay baahi weyn u qabtaa hoggaamin ay hagayso danta guud, kana madax-bannaan danaha shakhsiyeed iyo kuwa beeleed.

## GUNAANAD

Lixdan iyo lix sano ka dib helitaankii xornimada Soomaaliya, weli si buuxda looma fahmin macnaha dawladnimo. Ma jirin qorshe qeexan oo laga lahaa nooca dawladnimo ee Soomaaliya yeelan doonto gumaysiga ka dib. Hab-dhaqannadii kala duwanaa ee gumaystayaashii kala maamulayey gobollada kala duwan, sida Koonfurta iyo Waqooyiga, waxay sababeen in aan la yeelan aragti mideysan oo ku saabsan nidaamka dawladnimada iyo hab-dhaqanka siyaasadeed. Noloshii dhaqanka ayaa u gudubtay hay'adaha dawladnimada. Hay'adaha dawladda waxay noqdeen goobo ay bulshadu u aragto meel laga macaasho ama laga cooto, halkii ay ka ahaan lahaayeen hay'ado bulshada u adeega. Siyaasaddu kuma dhisna keenidda isbeddel dhaqaale, horumarinta bulshada iyo u adeegidda danta guud.

Sidoo kale, weli si dhab ah looma fahmin nidaamka federaalka ee lagu heshiiyey inuu noqdo hannaan isku haya dalka, kana qayb qaata dib u soo celinta bulshada ku kala irdhowday dagaalkii sokeeye iyo burburkii baahsanaa ee aan waxba reebin, kaas oo meesha ka saaray is-aaminkii bulshada iyo awooddii ay wax ugu midoobi lahayd.

Taariikhdu waxay qori doontaa in aan guul lagu gaadhi karin dastuur si joogto ah loo beddelo ama lagu kala adkaado cudud milatari. Guusha iyo hirgelidda dawladnimo waarta waxaa suurta gelin kara oo keliya marka hoggaanka siyaasadda, culimada diinta, aqoonyahanka, ganacsatada, odayaasha dhaqanka iyo bulshada guud ay yeeshaan aragti, hiigsi iyo himilo qaran oo danta guud iyo dhisidda hay'adaha dawladda ka hormarisa danaha shakhsiyeed, kuwa beeleed iyo nin-jeclaysiga.

# 28 SANO KADIB ASAASKII PUNTLAND

## BALLANTII GAROOWE IYO XISAABTA TAARIIKHDA



Sakariya Axmed Maxamed (Rabiic)




**Xigashada Sawirka**: Xasuus Hore

## HORDHAC: BALLANTII GAROOWE IYO BILOWGII PUNTLAND

Aasaaskii Puntland sannadkii 1998-dii wuxuu ahaa jawaab siyaasadeed oo loo helay xaaladdii adkayd ee Soomaaliya ka jirtay kadib burburkii dowladdii dhexe iyo dagaalladii sokeeye ee xigay. Xilligaas, dib-u-dhiska dowladnimada Soomaaliya wuxuu u muuqday hawl fog oo adag, halka dadaalladii dib-u-heshiisiinta qarankuna ay ku guuldarraysteen inay soo saaraan hannaan siyaasadeed oo la isku raacsan yahay.

Duruuftaas dhexdeeda ayay ka dhalatay Puntland. Ujeeddadu ma ahayn oo keliya in la abuuro maamul deegaan oo daboola baahiyaha amni iyo maamul ee deegaannada waqooyi-bari Soomaaliya, balse waxay ahayd in la dhiso tusaale dowladnimo oo gacan ka geysan kara dib-u-dhiska Soomaaliya oo dhan.

Axdigii lagu aasaasay Puntland 15-kii Maayo,1998 wuxuu si cad u qeexayay himilooyinkaas. Waxaana lagu sheegay in shacabka Puntland ay doonayaan inay ka gudbaan dhaxalkii ay reebeen kali-talisnimadii dhacday, dagaalladii sokeeye iyo fashilkii geeddi-socodyadii dib-u-heshiisiinta, isla markaana ay ka shaqeeyaan Soomaaliya federaal ah oo ku dhisan nabad, caddaalad iyo awood-qaybsi.

Himiladaas waxay ahayd mid ka weyn dhismaha maamul keliya; waxay ahayd mashruuc siyaasadeed oo ku saabsan nooca dowladnimo ee la doonayo in Soomaaliya dib loogu dhiso.

## 28 SANO KADIB: GUULAHA IYO CAQABADAHA DOWLADNIMADA

Marka la qiimeynayo 28-kii sano ee la soo dhaafay, waxaa muuqata in Puntland ay gaartay guulo muhiim ah. Waxay ku guulaysatay inay ilaaliso xasillooni siyaasadeed iyo mid amni xilli qaybo badan oo dalka ka mid ahi ay la tacaalayeen colaado iyo burbur joogto ah. Waxay sidoo kale dhistay hay'ado dowladeed, nidaam maamul iyo hannaan siyaasadeed oo sii shaqaynayay muddo dheer.

Waxaa intaas dheer in Puntland ay door muhiim ah ka ciyaartay geeddi-socodka dib-u-dhiska Soomaaliya, gaar ahaan doodaha la xiriira federaalka iyo qaab-dhismeedka dowladda Soomaaliyeed.

Si kastaba ha ahaatee, jiritaanka maamul iyo joogitaanka hay'ado dowladeed keligood ma dhammaystiraan mashruuca dowladnimada. Su'aasha muhiimka ahi waxay tahay heerka ay hay'adahaasi u shaqeeyaan, awoodda ay leeyihiin iyo sida ay uga madax-bannaan yihiin saameynta siyaasadeed.

Dowladnimada casriga ahi waxay ku dhisan tahay hay'ado xooggan oo ku shaqeeya sharci iyo nidaam, halka nidaamyada ku tiirsan shaqsiyaad ay inta badan daciifaan marka hoggaamiyeyaashu is beddelaan. Sidaas awgeed, dhismaha hay'adaha ayaa weli ah caqabadda ugu weyn ee hortaalla Puntland.

Waxaa muuqata in awoodda siyaasadeed iyo tan maaliyadeed ay si weyn ugu urursan tahay xarumo kooban oo dowladda ka tirsan. Taasi waxay yareynaysaa awoodda iyo madax-bannaanida hay'adaha kale, gaar ahaan kuwa loogu talagalay kormeerka, isla xisaabtanka iyo ilaalinta sharciga.

Marka hay'aduhu ku tiirsanaadaan oggolaansho siyaasadeed si ay u gutaan shaqooyinkooda ama u helaan dhaqaalihii ay ku shaqayn lahaayeen, madax-bannaanidoodu waxay noqotaa mid xaddidan. Tani waxay si toos ah u saamaysaa tayada maamulka iyo awoodda lagu xaqiijin karo isla xisaabtanka.

## HAY'ADAHA IYO CAQABADDA ISLA XISAABTANKA

Mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee dowlad kasta horyaalla waa dhismaha nidaam awood u leh inuu ilaaliyo hantida dadweynaha iyo ku dhaqanka sharciga.

Musuqmaasuqu ma aha oo keliya lacag la lunsado ama hanti si khaldan loo isticmaalo. Wuxuu inta badan ka dhashaa hay'ado daciif ah iyo nidaamyo kormeer oo aan si buuxda u shaqaynayn. Marka hay'adaha kormeerku ay lumiyaan awooddooda ama ay ku tiirsanaadaan hay'adaha ay tahay inay la xisaabtamaan, waxaa adkaanaysa in la helo hufnaan iyo daahfurnaan dhab ah.

Sidaas darteed, xoojinta hay'adaha sida Garsoorka, Xeer Ilaalinta Guud, Hanti-dhawrka Guud iyo Xisaabiyaha Guud waa arrin muhiim u ah mustaqbalka Puntland. Hay'adahani waxay u baahan yihiin madax-bannaani sharci iyo mid

dhaqaale si ay u gutaan waajibaadkooda iyaga oo aan la kulmin cadaadis siyaasadeed.

## FEDERAALKA IYO BALLANTII BAAHINTA MAAMULKA

Mid ka mid ah qodobbadii muhiimka ahaa ee Axdiga Puntland wuxuu ahaa hirgelinta nidaamka is-maamulka gobollada iyo degmooyinka. Magacaabista maamulka gobollada iyo degmooyinka waxaa lagu tilmaamay xal ku meel gaar ah oo ay sababeen duruufihii xilligaas jiray.

Su'aasha maanta taagan ayaa ah in duruufahaas ku meel gaarka ahi ay weli jiraan iyo in kale.

Baahinta maamulka iyo xoojinta dowladaha hoose waxay muhiim u yihiin dimuqraadiyadda, isla xisaabtanka iyo horumarinta adeegyada bulshada. Marka maamulka loo soo dhaweeyo shacabka, waxaa kordha ka qaybgalka bulshada iyo kalsoonida ay ku qabaan hay'adaha dowladda.

Dhanka kale, Puntland waxay muddo dheer ahayd hormuudka taageeraya federaalka Soomaaliya. Hase yeeshee, weli waxaa jirta baahi loo qabo in si cad loo qeexo nooca federaalka ay Puntland doonayso iyo qaabka ay u aragto awood-qaybsiga u dhexeeya dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyada.

Federaalku ma aha hal qaab oo meel kasta si isku mid ah uga shaqeeya. Dalal kala duwan ayaa qaatay qaabab kala duwan oo ku salaysan taariikhdooda iyo xaaladahooda siyaasadeed. Sidaa darteed, Puntland waxay u baahan tahay aragti siyaasadeed oo qeexaysa qaabka federaalka ee ay taageersan tahay iyo sababaha ay u dooranayso.

## MUSTAQBALKA PUNTLAND IYO CASHARKA 28-KA SANO

Sannad-guurada 28-aad ee Puntland waa fursad lagu qiimeeyo wixii la qabtay iyo wixii weli dhiman. Guulaha la gaaray waa muhiim, laakiin sidoo kale waa muhiim in si daacad ah loo aqoonsado meelaha u baahan dib-u-habayn iyo horumar.

Jiilkii 1998-dii wuxuu qabtay shaqadii ugu adkayd, taas oo ahayd in la abuuro maamul iyo xasillooni xilli ay duruufuhu aad u adkaayeen. Jiilka maanta jira waxaa horyaalla hawl kale oo aan ka yarayn tii hore: dhismaha hay'ado xooggan, nidaam maaliyadeed oo hufan iyo hannaan siyaasadeed oo bisil.

Taariikhda dowladuhu waxay muujinaysaa in guusha muddada dheer aan lagu cabbirin muddada uu maamul jiro, balse lagu cabbiro tayada hay'adaha uu dhiso iyo awoodda uu u leeyahay inuu abuuro nidaam ka sarreeya shaqsiyaadka iyo isbeddellada siyaasadeed.

Marka la eego 28-kii sano ee la soo dhaafay, su'aasha ugu muhiimsani ma aha halka Puntland ka timid, balse waa halka ay doonayso inay gaarto iyo nooca dowladnimo ee ay rabto inay uga tagto jiilasha soo socda.

Jawaabta su'aashaasi waxay noqon doontaa xisaabta dhabta ah ee Ballantii Garowe.



# SAGAALKA QODOB OO QAABEEYEY BULSHADA SOOMAALIYEED



Dr. Cabdiraxmaan Baadiyow



Xigashada Sawirka: AI

# HORDHAC

Bulshada Soomaaliyeed waxay soo martay isbeddello waaweyn oo taariikhi ah oo ka dhashay isdhexgalka arrimo diimeed, bulsheed, siyaasadeed, dhaqaale, iyo dhaqan. Laga soo bilaabo fiditaankii Islaamka iyo kaalintii muhiimka ahayd ee culimada diinta, isbeddelladii hay'adihii dhaqanka, saamayntii gumaysiga, soo ifbixii waddaniyadda Soomaaliyeed sannadkii 1943, iyo dhismaha dowladdii casriga ahayd, marxalad kasta waxay soo kordhisay fikrado iyo caqabado cusub oo dib u qaabeeyey nolosha Soomaaliyeed. Sidoo kale, burburkii dowladdii dhexe, dagaalladii sokeeye, soo bixitaankii qurbo-joogta Soomaaliyeed, nidaamka awood-qaybsiga ku salaysan beelaha, federaalaynta, iyo saameynta juqraafi-siyaasadeed ee gobolka iyo dunida ayaa noqday arrimo kale oo sii beddelay jihada bulshada iyo siyaasadda Soomaaliyeed. Arrimahan waxay saameyn ku yeesheen qaababka hoggaaminta, hab-dhismeedka bulshada, aqoonsiga, qiyamka, iyo xiriirka ay Soomaalidu la leedahay dunida inteeda kale. Maqaalkani wuxuu si kooban u eegayaa xoogagga waaweyn ee qaabeeyey isbeddelka bulshada Soomaaliyeed iyo saamayntooda joogtada ah ee horumarka taariikheed ee dalka

# 1.FIDITAANKA ISLAAMKA

fiditaanka Islaamka wuxuu isbeddel wayn ku sameeyay bulshada Somaaliyeed. Islaamku wuxuu soo kordhiyay nidaamyo cusub oo aqoon, qiyam, iyo hab-nololeed bulsheed, taas oo horseeday soo bixitaanka culimo door weyn ku yeeshay diinta, waxbarashada, iyo hagidda bulshada. Qaar badan oo ka mid ah culimadan waxay ku xirnaayeen labada dariiqo Suufi ee waaweyn ee saameynta ku yeeshay nolosha diineed ee Soomaaliyeed: Qaadiriyadda iyo Axmadiyadda. Iyagoo adeegsanaya waxbarashada Islaamiga ah, wacdiga, iyo hagidda bulshada, waxay gacan ka geysteen horumarinta aqoon, anshax, iyo faham cusub oo bulshada dhexdeeda ah. Saamaynta Islaamku kuma koobnaan dhinaca diinta oo keliya, balse waxay gaartay dhismaha dowladnimo, iyadoo kaalin ka qaadatay soo bixitaankii saldanado Muslim ah oo awood lahaa xilligii dhexe, sida Saldanaddii Cadal iyo Saldanaddii Ajuuraan, kuwaas oo door muhiim ah ka ciyaaray maamulka, ganacsiga, waxbarashada, iyo siyaasadda gobolka. Sidaas darteed, Islaamku wuxuu noqday awood taariikhi ah oo dib u qaabaysay bulshada Soomaaliyeed, hay'adaha siyaasadeed, iyo aqoonsiga taariikheed ee Soomaaliyeed.

# 2.GUMAYSIGA IYO KALA QAYBINTII DHULKA SOOMAALIYEED

Gumeysigii wuxuu horseeday isbeddel wayn. Hoos u dhicii dowladihii waaweynaa ee Muslimiinta Soomaaliyeed iyo kala firdhidii tartiib-tartiib ahayd ee bulshada oo u kala baxday maamullo yaryar oo ku salaysnaa beelo, waxay soo jiidatay gumeysiga. Xilligaas waxaa billowday marxalad cusub oo isbeddel ah, iyadoo qarnigii sagaal iyo tobnaad ay quwadihii Yurub xiisaynayeen Geeska Afrika sababo la xiriira muhiimadda istaraatiijiga ah ee Soomaaliya iyo marinada ganacsi ee isku xira Afrika, Carabta, iyo Aasiya. Tani waxay soo jiidatay Ingiriiska, Faransiiska, Talyaaniga, iyo Itoobiya oo ku tartamayey gacan ku haynta dhulalka Soomaaliyeed. Natiijadii ka dhalatay tartankaas ayaa noqotay in dhulkii Soomaaliyeed loo kala qaybiyo shan qaybood. Kala qaybsanaantani waxay si weyn u beddeshay bulshada Soomaaliyeed, iyadoo carqalad ku keentay nidaamyadii siyaasadeed, beddeshay qaababkii dhaqaale iyo maamul, soo gelisay nidaamyo cusub oo waxbarasho iyo dowladnimo, isla markaana abuurtay xuduudo macmal ah oo kala geeyay bulshooyin Soomaaliyeed oo hore isugu xirnaa.

# 3.WADDANIYADDA SOOMAALIYEED IYO HALGANKII MIDNIMADA

Soo ifbixii waddaniyadda Soomaaliyeed horraantii 1940-meeyadii waxay horseeday Isbeddel wayn. Iyadoo laga jawaabayo gumaysiga iyo kala qaybsanaantii dhulalka Soomaaliyeed, aqoonyahanno, siyaasiyiin, iyo hoggaamiyeyaal bulsho ayaa sameeyay dhaqdhaqaaq waddani ah oo ku dhisnaa is-maamul, midnimo, iyo soo celinta madax-bannaanida Soomaaliyeed. Aasaaskii Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed (SYL) sannadkii 1943-dii wuxuu noqday tallaabo taariikhi ah oo lagu abaabulay halganka xornimada iyo mideynta dhulalka Soomaaliyeed. Dhaqdhaqaaqa waddaniga ahi wuxuu beddelay fahamka siyaasadeed ee Soomaalida, isagoo ka gudbay daacadnimadii ku koobnayd beelaha

iyo dariiqooyinka Suufiyada, una beddelay dareen qarannimo iyo masiir-wadaag. Halgankaasi wuxuu ugu dambayn horseeday xornimadii 1960-kii iyo dhismaha Jamhuuriyadda Soomaaliyeed, taas oo ahayd isku day lagu doonayay in lagaga gudbo kala qaybsanaantii gumaysiga laguna dhiso qaran Soomaaliyeed oo mideysan.

## 4.DHISMAHA DOWLADNIMADA CASRIGA AH

Dhismaha dowladdii casriga ahayd ee Soomaaliyeed sannadkii 1960-kii, taas oo ku dhisnayd qaabka dowlad-qaran ee Yurub (nation state), wuxuu hordeeday Isbedel wayn. Midowgii Soomaalilaandtii Ingiriiska iyo Soomaalilaandtii Talyaaniga wuxuu horseeday aasaaska Jamhuuriyadda Soomaaliyeed, taas oo lagu dhisay hay'ado dhexe, dowlad qaran, nidaam sharci, waxbarasho casri ah, iyo maamul xirfad leh. Dowladdu waxay keentay isbeddello muhiim ah sida koboca magaalooyinka, xoojinta aqoonsiga qaran, iyo horumarinta adeegyada bulshada. Hase yeeshee, dhismaha dowladnimadu waxay xambaarsanayd fikrado kasoo horjeeda dhaqanka iyo Islaamka, wuxuu la kulmay caqabado ay ka mid ahaayeen khilaafka u dhexeeyay hal-doorka siyaasadeed iyo la falkalka guracan ee nidaamka beelaha, sinnaan la'aanta gobollada, daciifnimada hay'adaha dawladda, iyo dhaqanka siyaasadeedka hal-doorka ee xumaaday. Waxaa intaas usii dheeraa raadka uu ku reebay dagaalka qaboobaa. Caqabadahan is biirsaday waxay ugu dambayn gacan ka geysteen burburkii dowladdii Soomaaliyeed sannadkii 1991-dii, kaddib soddon sano oo madax-bannaani ah.

## 5.DHAQDHAQAAQYADA ISLAAMIYIINTA

Soo muuqashadii dhaqdhaqaaqa Islaamiga ah sannadihii 1960-meeyadii, kaas oo ku baaqayay dib-u-soo-nooleynta qiyamka Islaamka iyo ku dhaqanka mabaadi'diisa ee nolosha bulshada iyo siyaasadda, wuxuu horseeday Isbeddel wayn. Dhaqdhaqaaqan wuxuu ka dhashay jawaab ku wajahan caqabadaha casriyeynta iyo farqiga la dareemay ee u dhexeeyay aqoonsiga Islaamiga ah ee bulshada iyo nidaamka dowladeed ee cusbaa. Islaamiyiintu waxay xoogga saareen waxbarashada Islaamiga ah, dib-u-habaynta akhlaaqda, caddaaladda bulshada, iyo dhismaha hay'ado diimeed iyo waxbarasho. Dhaqdhaqaaqani wuxuu horseeday soo bixitaanka aqoonyahan Islaami ah oo cusub, wuxuuna noqday xoog muhiim ah oo saameeya bulshada Soomaaliyeed, gaar ahaan kaddib burburkii dowladdii dhexe sannadkii 1991-dii, markii ururrada Islaamiga ahi ay door weyn ka qaateen waxbarashada, adeegyada bulshada, dib-u-heshiisiinta, iyo siyaasadda.

## 6. QURBO-JOOGTA SOOMAALIYEED

Qurbo-joogta Soomaaliyeed waxay noqdeen mid ka mid ah xoogagga ugu muhiimsan ee taageeray badbaadada bulshada iyo dib-u-dhiska dalka. Iyagoo ku kala firirsan daafaha dunida, waxay door weyn ka qaateen dhaqaalaha iyagoo soo diray xawaalado, maalgeliyay ganacsiyo, taageeray adeegyada bulshada, kana qayb qaatay koboca magaalooyinka iyo abuurista fursado shaqo. Sidoo kale, qurbo-joogtu waxay keeneen aqoon, xirfado, iyo waayo-aragnimo cusub oo saameysay waxbarashada, caafimaadka, tiknooloojiyadda, iyo isbeddelka bulshada. Dhinaca siyaasadda, waxay noqdeen awood muuqata oo ka qayb qaadata dib-u-heshiisiinta, dhismaha hay'adaha dowliga ah, iyo geeddi-socodka siyaasadeed ee dalka. Inkastoo doorkooda uu mararka qaar dhaliyay dood ku saabsan xiriirka u dhexeeya aqoonta dibadda iyo xaqiiqada gudaha, haddana qurbo-joogta Soomaaliyeed waxay noqdeen xoog taariikhi ah oo si weyn u qaabeeyey dhaqaalaha, bulshada, iyo siyaasadda Soomaaliya kaddib burburkii dowladnimada.

## 7. BULSHADA RAYIDKA AH

Kaddib burburkii dawladdii dhexe ee Soomaaliya sannadkii 1991-kii, bulshada rayidka ah waxay noqotay mid ka mid ah xoogagga ugu muhiimsan ee buuxiyay meelihii ay ka baxeen hay'adihii dowladeed, kana qayb qaatay badbaadinta bulshada iyo dib-u-dhiska dalka. Ururrada aan dowliga ahayn, hay'adaha samafalka, ururrada haweenka iyo dhallinyarada, culimada, aqoonyahannada, iyo kooxaha bulshada ayaa door weyn ka qaatay bixinta adeegyada aasaasiga ah sida waxbarashada, caafimaadka, gargaarka bani'aadantinimo, iyo taageeridda nabadda iyo dib-u-heshiisiinta. Sidoo kale, bulshada rayidka ahi waxay noqotay madal lagu kobciyo wacyiga bulshada, difaaca xuquuqda muwaadiniinta, horumarinta dhaqanka wada-tashiga, iyo dhiirrigelinta ka

qaybgalka siyaasadeed. Inkastoo ay la kulantay caqabado ay ka mid yihiin amni-darro, ku tiirsanaanta maalgelinta dibadda, iyo saameynta siyaasadaha beelaha, haddana bulshada rayidka ahi waxay noqotay xoog muhiim ah oo qaabeeyey isbeddelka bulshada Soomaaliyeed iyo geeddi-socodka dib-u-dhiska dowladnimada kaddib burburkii qaranka.

## 8. AWOOD-QAYBSIGA BEELAHA IYO FEDERAALKA.

Nidaamka awood-qaybsiga ee 4.5 ee la qaatay 2000 iyo hirgelintii nidaamka federaalka. Kaddib burburkii dowladdii dhexe sannadkii 1991 iyo sannado badan oo colaado ah, dib-u-dhiska siyaasadeed ee Soomaaliya waxaa si weyn u saameeyay wadaxaajoodyo ku salaysan beelo iyo nidaamyo qoondooyin ah oo lagu qaybinayay matalaadda siyaasadeed. Inkastoo nidaamkani gacan ka geystay soo afjaridda colaado waaweyn iyo dib-u-dhiska hay'adaha dowladeed, haddana wuxuu sii xoojiyay doorka beelaha ee tartanka siyaasadeed iyo maamulka. Nidaamka federaalkuna wuxuu abuuray qaabab cusub oo maamul iyo dowlad-goboleedyo, balse wuxuu sidoo kale keenay caqabado la xiriira qaybsiga kheyraadka, awoodaha dowladeed, fasiraadda dastuurka, iyo xiriirka u dhexeeya dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada.

## 9. XAGJIRNIMADA MAGACA ISLAAMKA IYO FARAGELINTA DIBADDA

Arrintii sagaalaad ee si weyn u beddeshay bulshada iyo siyaasadda Soomaaliyeed waxay ahayd soo bixitaankii Midowgii Maxkamadaha Islaamiga ah, iyo markii dambe soo ifbixitaankii Al-Shabaab iyo Daacish, kuwaas oo ka faa'iidaystay amni-darrada, daciifnimada hay'adaha dowladeed, iyo tabashooyinka bulshada si ay uga hor yimaadaan awoodda dowladda una faafiyaan fikrado xagjir ah. Xilligaa kaddib sannadkii 2000 waxaa sidoo kale sii xoogaystay saameynta dibadda iyo faragelinta caalamiga ah ee arrimaha Soomaaliya, taas oo qayb ka noqotay kala qaybsanaanta hoggaanka siyaasadeed iyo ku tiirsanaanta siyaasiyiinta qaar taageero shisheeye si ay u sii jiraan. Ganacsiga siyaasadda, faragelinta iyo khal-khalgelinta doorashooyinka dadban, musuqmaasuqa, iyo adeegsiga joogtada ah ee beelaha sidii aalad siyaasadeed ayaa sidoo kale qaabeeyey siyaasadda Soomaaliya ee maanta. Isbeddelladan waxay ka tarjumayaan sii socoshada isbeddelladii taariikheed ee hore, balse waxay abuureen caqabado cusub oo ku wajahan dhismaha dowladnimo, horumarinta maamul dimuqraadi ah, iyo abuuridda dhaqan siyaasadeed qaran oo mideysan.

## GUNAANAD

Sagaalkaas xoog taariikheed ee soo maray bulshada Soomaaliyeed, fiditaanka Islaamka, gumaysiga iyo kala qaybsanaanta dhuleed, soo ifbixidda waddaniyadda, dhismaha dowladnimada casriga ah, dhaqdhaqaaqyada Islaamiga ah, Qurbajoogta, bulshada rayidka ah, nidaamka awood-qaybsiga beelaha iyo federaalka, iyo caqabadaha siyaasadeed ee casriga ah, oo ay weheliyaan isbeddellada waaweyn ee ka socda caalamka maanta, ayaa si wadajir ah u qaabeeyey jihada bulshada iyo siyaasadda Soomaaliyeed. Fahamka isdhexgalka xoogaggan iyo saamaynta ay ku leeyihiin mustaqbalka dalka ayaa lagama maarmaan u ah dejinta istaraatiijiyad waarta oo lagu dhisayo dowladnimo xooggan iyo bulsho Soomaaliyeed oo leh xasillooni, isku duubni, iyo horumar dhaqan-dhaqaale oo waara. Dib-u-dhiska Soomaaliya wuxuu u baahan yahay in laga faa'iidaysto casharrada taariikhda, la fahmo isbeddellada gudaha iyo dibadda, lana helo aragti qaran iyo hoggaan karti leh oo isku xira awoodaha bulshada, fursadaha dhaqaale, iyo xaaladaha cusub ee dunida.

# DAREENKA LAHAANSHAHA QARANKA:

## CAQABADAHA WACYI-LA'AANTA IYO WADDOOYINKA XALKA



Abdulljabaar Maxamed Muuse Farma




**Xigashada Sawirka**: AI

## HORDHAC: MA NUXUR BAA MISE WAA MUUQAAL?

Waddaniyaddu maaha kaliya heeso caadifad leh oo la qaado, mana aha calan la ruxo maalmaha xorriyadda oo kaliya; waa ficil, xilkasnimo, iyo dareen qoto dheer oo muwaadinka ku buraarujiya in dalka uu isagu leeyahay. Falsafadaha qadiimiga ah iyo kuwa casriga ahba waxay isku raaceen in dareenka lahaanshiyaha waddanku (Sense of Ownership) uu yahay mishiinka kaliya ee dhaqaajiya bedqabka, bilicda, iyo horumarka kaabayaasha dhaqaale ee qaran kasta.

Falsafad-yahankii weynaa ee reer Giriig, Aristotle, wuxuu yiri: "Waxa dadka oo dhami ay wada leeyihiin, waxaa ku yar daryeelka ugu yar, sababtoo ah qof kastaa wuxuu ka fekeraa naftiisa halkii uu ka fekeri lahaa danta guud." Oraahdan waxay si toos ah u qeexaysaa caqabada maanta taagan ee ah wacyi-la'aanta lahaanshiyaha dalka. Marka uu muwaadinku u arko hantida guud iyo nidaamka dawladnimada wax qariib ku ah oo aysan isaga waxba ka khuseyn, waxaa dhasha curyaanimo bulsho iyo mid dhaqaale oo raad xun kaga tagta jiilalka mustaqbalka.

## GARIIRKA GUDAHEENNA: MARKAY BULSHADU WACYI-LA'AAN TAHAY

Wacyi-la'aanta lahaanshiyaha dalku waxay si toos ah u waxyeeleysaa nolosha maalinlaha ah ee bulshada, waxayna ku bilaabataa dabeecado yaryar laakiin saameyn weyn leh. Waxaad arkaysaa muwaadin ku dhiiranaya inuu qashinka ku tuuro bartamaha waddada, isagoo u haysta in nadiifinta waddadaas ay tahay shaqo u taala dawladda oo kaliya, isagana aysan khuseyn. Sidoo kale, burburinta nalalka waddooyinka, jid-gooyooyinka sharci-darrada ah, iyo waxyeelaynta agabka dugsiyada iyo isbitaalada dawladdu waxay markhaati u yihiin inaan la fahamsanayn in hantidaas lagu dhisay canshuurta dadka, loona dhisay adeegga dadka.

Falsafadda bulshada dhexdeeda waxaa ka jira xeer la yiraahdo "Aragtida Daaqadda Jabtay" (Broken Windows Theory), kaas oo sheegaya in haddii deegaan ka mid ah magaalada lagu arko daaqad jabsan oo aan la dayactirin, ay taasi dadka ku dhiirangeliso inay daaqadaha kalena jebiyaan, wasakhdana ku badiyaan. Sidoo kale, marka hal muwaadin uu burburiyo hantida guud isagoon dareemin ciqaab sharci ama mid damiir, bulshada inteeda kale waxay u qaadataa in hantidaasi aysan cidna leeyahay, taas oo horseedda burbur guud. Dhibaatada ugu weyn waxay timaadaa marka dadku ay u arkaan canshuurta wax laga dhacayo, halkii ay u arki lahaayeen maalgashi dib loogu soo celinayo noloshooda.

## TUSAALAYAAL CAALAMI AH: JIDADKA LOO MARO TOOSINTA DAMIIRKA

Wadamo badan oo maanta dunida hormuud ka ah ama guulo waaweyn ka gaaray dib-u-dhiska qarannimada waxay soo mareen marxalado adag, laakiin waxay ku guuleysteen inay beddelaan fikradaha dadkooda iyagoo adeegsanaya sharciga, waxbarashada, iyo dhaqanka is-xilqaanka.

## RWANDA IYO FALSAFADDA "UMUGANDA":

Burburkii iyo xasuuqii dalkaas ka dhacay 1994-kii kadib, dawladdu waxay ogaatay inaan dalka lagu dhisi karin lacag dibadda laga soo amaahdo oo kaliya, balkan u baahan yahay gacmaha dadkiisa. Waxay dib u soo nooleeyeen nidaamka dhaqanka ah ee "Umuganda" (oo macnaheedu yahay isku imaatinka ujeeddo guud). Sabtida ugu dambaysa bishii, muwaadin kasta oo qaangaar ah, oo uu ku jiro madaxweynuhu, wuxuu u soo baxaa nadiifinta iyo dhismaha dalka. Maanta, caasimadda Kigali waa magaalada ugu nadiifsan qaaradda Afrika, sababtoo her qof kastaa wuxuu dareensan yahay inuu dalka isagu leeyahay.

## SINGAPORE IYO SHARCIGA ADAG (THE FINE CITY):

Hoggaamiyihii weynaa ee Singapore, Lee Kuan Yew, wuxuu aaminsanaa in anshaxu uu ka horreeyo xorriyadda aan xadka lahayn. Wuxuu yiri: "Haddii aadan haysan bulsho nidaam iyo kala dambayn leh, xorriyaddu waxba ma tarto." Singapore waxay adeegsatay ganaaxyo maaliyadeed oo culus si ay

dadka u barto ilaalinta bilicda iyo hantida guud. Qashin tuurista iyo waxyeelaynta agabka qaranka waxay horseedaysaa xadhig iyo ganaaxyo adag, taas oo maanta ka dhigtay mid ka mid ah xarumaha dhaqaalaha ee ugu horumarsan dunida.

## JAPAN IYO TARBIYADA DUGSIYADA (GAKKO CHOUSHI):

Dalka Japan, carruurta looma oggola inay noqdaan kuwo wax gubba ama wasakheeya. Laga soo bilaabo dugsiga xannaanada ilaa dugsiga sare, ma jiraan shaqaale gooni ah oo nadiifiya fasallada iyo suuliyada iskuulka; ardayda laftooda ayaa maalin kasta nadiifiya dugsiga. Waxbarashadan waxaa loo arkaa qayb ka mid ah dhismaha shakhsiyadda qofka si uu u barto in goobta uu ku nool yahay ay tahay mas'uuliyaddiisa. Markay weynaadaan, dabeecaddaas waxay u fidiyaan dalka dhan.

## GOOSASHADA MIRAHA: FAA'IIDOOYINKA DARYEELKA QARANKA

Marka wacyiga lahaanshiyaha dalku uu gaaro heer sare, bulshadu waxay gudaataa miraha isbeddelkaas, kuwaas oo isugu jira kuwo amni, dhaqaale, iyo bulsho:

- **Ilaalinta Hantida iyo Badbaadinta Miisaaniyadda:** Marka muwaadiniintu ay daryeelaan dugsiyada, buundooyinka, iyo isbitaalada, dawladdu uma baahato inay lacag badan ku bixiso dayactir joogto ah oo ka dhashay burburin ula kac ah. Lacagtaas waxaa loo weeciyaa mashaariic cusub.
- **Koraalka Dhaqaalaha iyadoo loo marayo Is-xilqaan:** Bixinta canshuurta waxay isku beddeshaa waajib sharaf leh. Muwaadinku wuxuu ogaadaa in canshuurta uu bixinayo ay tahay mida loogu dhisayo mustaqbalka carruurtiisa, taas oo dhimaysa musuqmaasuqa.
- **Xasillooni iyo Amni Gudaha Ah:** Bulsho dareensan lahaanshiyaha dalkeeda waxay noqotaa "indhaha iyo dhegaha" amniga. Sida uu yiri falsafad-yahan John F. Kennedy: "Ha weydiin waxa dalkaagu kuu qaban karo, laakiin weydii waxa aad u qaban karto dalkaaga."
- **Midnimo Bulsho iyo Tirtiridda Qabyaaladda:** Dareenka lahaanshiyaha waddanku wuxuu ka sarreeyaa qabiilka iyo gobolka. Waxay abuurtaa isku-duubni ka dhalata in dhammaan loo wada adeego hal ujeeddo oo ah danta guud.

## GUNAANAD: NAQSHADDA MUSTAQBALKA IYO TOOSINTA GURI-WEYNE

Wacyi-la'aanta naga haysata lahaanshiyaha dalka waa cudur dilaa ah oo ragaadiya hanka qaranimo, laakiin daawadiisu waxay ku jirtaa gacanteenna. Waxaan ku soo xirayaa xikmad caan ah oo dhiirrigelisa isbeddelka qofka ka bilaabma: "Haddii aad rabto inaad dunida beddesho, marka hore guriagaaga nadiifi." Dalku waa gurigeenna weyn, haddii aanan annagu daryeelin, cid kale oo noo daryeelaysa ma jirto.

Isbeddelku maaha mid si sahlan ku imaanaya; wuxuu u baahan yahay in laga bilaabo guriga oo carruurta lagu koriyo mas'uuliyadda, laga sii wado dugsiyada, laguna xoojiyo shuruuc adag oo qof kasta ku qasbaysa inuu ixtiraamo hantida guud iyo nidaamka dalka. Ma bixi karno, mana horumari karno ilaa aan maskaxda ka beddelno fikradda ah "Dawlad baa leh" oo aan u beddelno "Aniga ayaa leh".



# TAXANAHA "DIIN IYO DAWLAD"

## QEYBTA 3-AAD

Kala soocidda Diinta iyo Siyaasadda: Xaggee bay salka ku haysaa? Islaamkuse muxuu ka qabaa?



Dr. Maxamed Cali Faarax



Xigashada Sawirka: Alharam

# HORDHAC

Taxanaha "Diin iyo Dawlad" waxaan ugasoo hadlay Mad-habka Calmaaniyadda oo diinta ku koobaya xiriirka u dhexeeya qofka iyo Allaha abuuray, nolosha iyo maaraynteedana ka fogaynaya, wuxuuna salka ku hayaa dhaqan reer Galbeed oo diinta u arka mid aan ku habboonayna inay saamayn ku yeelato maaraynta nolosha dhinac kastaba.

Qormadaan iyo tan xigtaba waxaan ku qaadaa-dhigayaa "Kala soocidda diinta iyo siyaasadda" oo ah calaamadda koowaad ee lagu yaqaan Mad-habka Calmaaniyadda, anigoo milicsanaya meesha ay salka ku hayso iyo Islaamku wuxuu ka qabo.

Si loo fhamo mowduuca aan ka hadlayno, waxaan marka hore qeexaynaa macnaha erayada Diin iyo Siyaasad, si ay noogu fududaato fahanka mawduuca laga hadlayo:

# FASIRAADDA KALMADAHA: "DIIN" IYO "SIYAASAD":

**A) Kalmadda "DIIN":** luqad ahaan waxaa lagu macneeyaa sida soo socota:

1. **Macnaha 1-aad:** Diinta (الدين) asal ahaan waxaa loo isticmaalaa xukunka, maamulidda iyo awoodda lagu hago arrimaha aadanaha, kuwaas oo ka mid ah hawlaha boqorrada iyo madaxda, sida siyaasadda, maamulka, garsoorka, awood-ku-fulinta, isla xisaabtanka iyo abaalmarinta ama ciqaabta. Taas waxaa daliil u ah qowlka Alle ee ah: (مالك يوم الدين/ الفاتحة: 4): oo macnaheedu yahay: Maalinka Xisaabta iyo Abaal-marinta, maalinta dadka lagu qaadayo isla xisaabtan laguna guddoonsiinayo wixii ay camal faleen. Sidoo kale, xadiiska Nabiga (NNKH) ee leh: (الكيس من دان نفسه): "Qofka caqliga badan waa kan naftiisa xukuma, xakameeya, islamarkaasna ku haga jidka toosan".

   Waxaa isna macnahaa xambaarsan, ereyga "Ad-Dayyaan" (الديّان), waxaana loola jeedaa Xaakimka iyo Garsooraha, kan dadka ku kala xukuma caddaaladda, isla markaana kula xisaabtama falalkooda, waana magac ka mid ah magacyada Alle.

   Sidaas awgeed, marka loo eego dhinaca luqadda iyo asalka ereyga, diintu ma aha oo keliya caqiido ama cibaado gaar ah, balse waxay xanbaarsan tahay macnaha maamul, xukun, nidaamin, isla xisaabtan iyo abaalmarin ama ciqaab ku dhisan amar iyo hoggaan.

2. **Macnaha 2-aad:** diinta waxaa loola jeedaa u hoggaansamidda iyo adeecidda, iyo sidoo kale cibaadada iyo dhawrsanaanta (taqwada). Oraahda "Diintu Alle ayay u sugnaatay" (الدين لله), waxaa suuragal ah in laga fahmo laba macne oo is-dhammeystiraya: (1). Xukunka iyo talada Alle ayaa iska leh, oo isagu waa Xaakimka ugu sarreeya. (2). U hoggaansanaanta iyo adeecidda Alle ayaa loo gaar yeelay, taas oo macnaheedu yahay in cibaadada iyo daacadnimada loo hibeeyo Alle keliya.

   Labadan macne waxay ka tarjumayaan xiriirka ka dhexeeya Xaakimka (Alle) iyo kuwa la xukumo (addoomaha); mid wuxuu leeyahay xaqa xukunka iyo amarka, kan kalena waxaa laga doonayaa adeecid, hoggaansanaan iyo daacadnimo. Sidaas awgeed, diintu waa nidaam dhammaystiran oo isku haya xukun iyo adeecid, amar iyo hoggaansanaan, talin iyo cibaado.

3. **Macnaha 3-aad:** diintu waa manhajka, mabda'a ama hab-nololeedka uu qofku ku socdo, ha noqoto dhinaca fikirka iyo aragtida (theory) ama dhinaca dhaqanka iyo ficilka (practice). Diintu waa mabda'a uu qofku aaminsan yahay iyo manhajka uu ku dhaqmo, kuwaas oo si wadajir ah u hagaya fikirkiisa, dhaqankiisa iyo jihada noloshiisa.

**B) Diintu sharci ahaan waa:** Nidaam Eebbe dejiyey oo dadka ku hanuuniya xaqa dhinaca caqiidada iyo rumaynta, sidoo kale; ku haga wanaagga dhinaca akhlaaqda, dhaqanka iyo macaamilaadka.

Haddaba, diintu ma aha oo keliya arrin ku kooban cibaadooyinka iyo xiriirka addoonka iyo Eebbe; balse waa nidaam nololeed oo dhammaystiran oo hagaya fikirka, anshaxa, dhaqanka iyo xiriirrada bulshada, si uu qofka ugu horseedo caqiidada toosan iyo wanaagga nolosha.

**C) Diinta iyo Quraanka:**

Kalmadda "Diin" waxay kusoo aroortay quraanka iyadoo xambaarsan macnayaal kala duwan, marwalbana waxaa xaddidaya hadba siiqada iyo qaabka quraanka loogu xusay, bal ila eeg macnayaalkaas:

- Kalmadda "Diin", waxaa loola jeedaa: abaal-marin, sida Quraanku tilmaamay: (مالك يوم الدين/ سورة الفاتحة: 4).

- Waxaa kaloo "Diin" loola jeedaa: Daacad; sida ku cad Quraanka Alle: (وأخلصوا دينهم لله /النساء: **164).**
- Waxaa kale oo macnayaasha kalmadda "Diin" ka mid ah: Usuusha diinta iyo caqiidada, Alle wuxuu yiri isagoo arrintaas tilmaamaya: (**شرع لكم من الدين ما وصَّى به نوحاً والذي أوحينا إليك وما وصَّينا به إبراهيم وموسى وعيسى أن أقيموا الدين ولا تتفرَّقوا فيه كبر على المشركين ما تدعوهم إليه الله يجتبي إليه من يشاء ويهدي إليه من ينيب/ الشورى: 13**)

  Macnaha "Diinta" ee ay Aayaddu tilmaamayso waa midda ay dardaarantay Rususha Eebbe ee kala ah: Nebi Muxammed, Nebi Nuux, Nebi Ibraahim, Nebi Muuse, iyo Nebi Ciise (Naxiir iyo nabadgelyo korkooda ha ahaato); taasoo ah caqiidada toosan ee Alle nagu addoonsaday.
- Waxaa kaloo "Diin" loola jeedaa: Caqiido ay qolo diin ka dhigato, sida Alle yiri: (**لكم دينكم ولي دين/ الكافرون: 6**).

**D) Kalmadda "Siyaasad" (السياسة):**

Siyaasaddu asal ahaan waa: maamulidda iyo daryeelka danaha iyo masaalixda bulshada.

Qaamuuska Culuunta Siyaasadda ee ay soo saartay Kuwait University, isagoo ka soo xiganaya qaamuuska Le Robert Dictionary, wuxuu siyaasadda ku qeexayaa:

"Siyaasaddu waa fanka iyo xirfadda lagu maamulo laguna hago bulshooyinka bani'aadamka".

Qaamuuska sharciga ayaa isna siyaasadda ku qeexaya:

"Siyaasaddu waa mabaadi'da, habraacyada iyo farsamooyinka lagu maamulo laguna hago arrimaha guud ee bulshada iyo dawladda".

**E) Siyaasadda iyo dhaxalka Islaamka (السياسة والتراث الإسلامي):**

Kalmadda "Siyaasad" kuma soo aroorin Quraanka, balse waxaa lagu xusay erayo la macno ah oo ay ka mid yihiin "Mulki", iyo "Xukun"; Alle wuxuu yiri:

**وقال لهم نبيهم إن الله قد بعث لكم طالوت ملكاً/ البقرة: 247).**

Wuxuu kale Alle yiri:

**(وقتل داود جالوت وآتاه الله الملك والحكمة وعلَّمه مما يشاء/ البقرة: 251).**

Quraanku wuxuu kaloo nooga warramay Boqoddii xukumi jirtay Saba ee Yemen, wuxuuna ku sheegay in xukunkeedu ahaa mid ku dhisan isla-tashi (Shuuro), Alle wuxuu yiri isagoo ka xikaayoonaya:

**(إني وجدت امرأة تملكهم وأوتيت من كل شيء ولها عرش عظيم: سورة النمل/23)**

Shimbirkii Hudhudka ahaa ayaa yiri isagoo Nebi Sulaymaan uga sheekaynaya wuxuu soo arkay: "Waxaan soo arkay haweeney Boqorad ah oo dhul wayn madax u ah, sariir boqortooyo oo aad u waynna ku haysata". Quraanku meelo badan ayuu ku dhaleeceeyey xukunka dulmiga iyo caddaalad darrada ku dhisan, Alle wuxuu yiri:

**(إن فرعون علا في الأرض وجعل أهلها شيعاً يستضعف طائفة منهم يذبح أبناءهم ويستحيي نساءهم إنه كان من المفسدين/ القصص: 4)**

Macnaha Aayaddu wuxuu noqonayaa: "Hubaal, Fircoon wuxuu ku kibray dhulka (Masar), wuxuuna dadkii ku noolaa u kala qaybiyay kooxo kala sarreeya, isagoo si gaar ah u daciifinayay qayb ka mid ah bulshada. Wuxuu gawracayay wiilashooda, halka uu dumarkoodana nolol u deynayay. Runtii, wuxuu ka mid ahaa kuwa fidnada, dulmiga iyo fasahaadka ku faafiya dhulka."

Waxaa ka mid ah Aayadaha tilmaamaya in Aadanuhu yahay waayeelka adduunka (Khaliifka) Qowlka Alle (SWT):

**(وعد الله الذين آمنوا منكم وعملوا الصالحات ليستخلفنهم في الأرض كما استخلف الذين من قبلهم وليمكنن لهم دينهم الذي ارتضى لهم وليبدلنهم من بعد خوفهم أمناً يعبدونني لا يشركون بي شيئاً ومن كفر بعد ذلك فأؤلئك هم الفاسقون/ النور: 55)**

Macnaha Aayadduna waa sidan: "Alle wuxuu u ballanqaaday kuwa idinka mid ah ee Alle rumeeyey; isla markaana camal saalax ah sameeyay, inuu ka dhigi doono kuwo xilka iyo maamulka dhulka la wareega, sidii uu madax uga dhigay kuwii ka horreeyay. Wuxuu sidoo kale u sugi doonaa diintooda uu u doortay, ugana raalli noqday, wuxuuna cabsidooda ka dib ugu beddeli doonaa ammaan iyo xasillooni. Aniga oo keliya ayay I caabudayaan, cidnana wax ilama wadaajiyaan oo cibaadada waa ii barax tiraan. Ciddii intaas ka dib gaaloowda ama ka leexata jidka toosan, kuwaasi waa kuwa ka baxay adeecidda Eebbe".

Sidoo kale; Aayadaha xukunka tilmaamay waxaa ka mid ah Qowlka All (SWT):

**(إن الله يأمركم أن تؤدوا الأمانات إلى أهلها وإذا حكمتم بين الناس أن تحكموا بالعدل/ النساء: 58)**

Macnaha Aayaddu waa: “Runtii, Alle wuxuu idin farayaa inaad ammaanooyinka gaarsiisaan cidda xaqa u leh, markaad dadka u kala garnaqaysaanna aad ku xukuntaan caddaalad iyo eex la’aan”.

Erayga Siyaasad” wuxuu asal ku leeyahay Sunnada Nebi (SCW), sida uu tilmaamayo Xadiiskan Shariifka ee ay wariyeen Imaan Bukhaari iyo Muslim:

**عن أبي هريرة، أن النبي ـ صلى الله عليه قال: “كانت بنو إسرائيل تسوسهم الأنبياء، كلما هلك نبي خلفه نبي، وإنه لا نبي بعدي”**

Macnaha xadiisku waa sidan: “Reer Banii Israa’iil waxaa maamuli jiray oo arrimahooda hagi jiray nebiyada. Mar kasta oo nebi geeriyoodo, nebi kale ayaa beddeli jiray. Hase yeeshee, aniga dabaday nebi ma jiri doono”.

**Mowsuucada Fiqhiga ee Kuwait Maaddada “Siyaasadda- ” waxa lagu sheegay sidan:**

“Waxa laga yaabaa in qoraalkii ugu horreeyay ee erayga ‘siyaasad’ loogu adeegsaday macnaha la xidhiidha maamulka iyo xukunka uu yahay hadalkii Camr ibn al-Caas uu ku tilmaamay Muucaawiya markii uu la hadlayay Abuu Muusaa al-Ashcari. Wuxuuna yidhi: ‘Waxaan ku arkay inuu yahay wakiilka khaliifkii dulmiga lagu dilay ee Cuthmaan, dalbadayna in loo qisaaso (loo dilo) kuwii dhiiggiisa daadiyay; waana nin ku wanaagsan maamulka iyo hoggaaminta, isla markaana ku xeeldheer maaraynta iyo qorshaynta arrimaha bulshada”.

Ibnu Abii Shaybah wuxuu ku weriyey kitaabkiisa Al-Musannaf, halka Al-Xaakim uu ku xusay Al-Mustadrak, isaga oo ka soo weriyey Al-Mustazill bin Xusayn, kaas oo yiri:

“Mar ayuu noo khudbeeyey Cumar ibnul Khaddaab (RC), wuxuuna yiri:

“Waxaan ogahay – Rabbiga Kacbada ayaan ku dhaartaye – goorta Carabtu halaagsami doonto. Markaas nin Muslimiinta ka mid ah ayaa istaagay oo ku yiri: “Goorma ayay halaagsami doonaan, Amiirka Mu’miniintow?”. Wuxuu ku jawaabay: “Waxay halaagsami doonaan marka ay arrimahooda hoggaamiyaan dad aan soo marin waayo-aragnimadii Jaahiliyada, isla markaana aan la soo saaxiibin Rasuulka (NNKH)”.

Hadalka Cumar ibnul Khaddaab wuxuu tilmaamayaa in hoggaaminta ummaddu u baahan tahay:

- Khibrad iyo aqoon ku saabsan xaaladaha bulshada iyo sida loo maareeyo.
- Faham qoto dheer oo ku salaysan tarbiyadda iyo Siirada Nebiga (SCW).
- Hoggaamiye leh waayo-aragnimo, bisayl siyaasadeed iyo garasho, si uu u kala saaro xaqa iyo baadilka uguna hago bulshada si xikmad leh.

## GUNAANAD:

Inay noo caddaato macnaha ay xambaarsantahay kalmadda “Diin” iyo kalmadda “Siyaasad”, waxay noo fududaynaysaa fahanka mowduuca la xiriira “kala soocidda diinta iyo siyaasadda”, kaasoo aan uga hadli doonno xalqadda afraad ee aan ku baahin doonno Majaladda Marag cadadkeeda 17aad haddii Alle nagu simo.

## TIXRAACYADA:


1. الموسوعة الفقهية الكويتية (25/295، 296).
2. تاريخ الطبري (5/68)، طبعة دار المعارف. القاهرة.
3. موسوعة العلوم السياسية. إصدار جامعة الكويت.
4. الدين والسياسة للدكتور يوسف القرضاوي، من إصدارات المجلس الأوروبي للإفتاء والبحوث، دبلن، 2007.

# JAMHUURIYAD QABYO AH:

## 66 SANO KADDIB, XUS IYO XASUUS IS-KHILAAFSAN



Xildh. Cabdullaahi Faarax Mire



Xigashada Sawirka: AI

# HORDHAC: RIYOOYIN AAN RUMOOBIN OO RIYAAQOODUNA DHAMMAAN

Maalintii 1 da Luulyo 1960, Soomaaliya waxay gashay bog cusub oo taariikheed, iyadoo calankeeda buluugga ahi uu markii ugu horreysay cirka u shareeray. Madaxweyne Aden Cabdulle Cismaan, ayaa khudbaddii uu ka jeediyey barxadda Golaha Shacabka, ku dhawaaqay erayo weli ku jira xusuusta ummadda: "Maanta waxaan nahay Soomaali, maanta waxaan nahay dad madax bannaan oo gob ah. Maanta waxaan helnay dal iyo calan." Dadkii farxadda la ooyaya ee ku sugnaa Piazza della Solidarietà Africana waxay u sacbiyeen riyo ay tobannaan sano ku haminayeen, dad fara weynna ay qabuuraha darteed u galeen.

Khudbaddiisu waxay ahayd baaq qaran oo ku dhisan rajo, sharaf iyo mas'uuliyad. Wuxuu xusuusiyay shacabka in taariikhdooda ay ka buuxdo halgan xanbaarsan rajo iyo filasho wanaagsan, wuxuuna ugu baaqay dadka Soomaaliyeed inay difaacaan qiyamka dowladnimada ee dimuqraadiyadda, caddaaladda, nabadda iyo ixtiraamka. Wuxuu si gaar ah u adkeeyay in la dhowro hay'adaha qaranka, isagoo yiri: "Aan sharafno oo aan dhowrno hay'adaha dimuqraadiyadda". Sidoo kale, waxa uu ka digay musuq-maasuqa iyo maamul xumada, dunidana waxa uu la wadaagay in dawladdaan curatay ay tahay mid ka shaqayn doonta nabadda, xiriir saaxiibtinimo oo wanaagsanna la yeelan doonto dalalka kale.

Shan cisho ka hor, 26-kii Juun 1960, Gobollada Waqooyi (Somaliland) ayaa ka xoroobay Ingiriiska. Fagaaraha Khayriyadda ee Hargeysa, Abwaan Cabdilaahi Suldaan Timacadde ayaa tiriyay gabaygii caanka ahaa "Kaana Siib, Kanna Saar" oo uu ku muujinayo farxadda xornimada iyo calan Soomaaliyeed oo lagu bedelaayo calankii guumaysiga ee xanbaarsanaa dulmiga. Dareenka midnimada iyo Soomaalinimaduna dadka dhan qanjaha ayuu joogay.

Si kastaba ha ahaatee, 66 sano kadib, riyooyinkaas quruxda badan badankood ma rumoobin, riyaaqooduna weli ma dhammaan. Dimuqraadiyaddii lixdankii lagu faani jiray waxaa soo afjaray afgembigii 1969-kii, waxaana bilowday xukun kali talis ah oo burburiyay kalsoonidii shacabka, qoto dheereeyay kala qaybsanaantii bulshada, kuna tallaabsaday ku xadgudub xuquuqda aadimiga ah ee muwaadiniinta. Ugu dambayntiina, 1991 dii dowladdii ayaa burburtay, dagaal sokeeye ayaa qarxay, malaayiin qof ayaa barakacay, hay'adihii qaranka ee Madaxweyne Aden Cabdulle ku boorriyay dadku in ay ilaashadaan maalinkii xoriyadda, waxa ay ku burburiyeen gacmahooda.

Riyadii midnimada Soomaaliyeedna ma rumoobin. Jabuuti waxay qaadatay waddo u gaar ah, oo waxa ay noqotay dawlad madax-banaan, Ogaadeen iyo NFD waxay ku hadheen gacanta Itoobiya iyo Kiinya, jamhuuriaddii dhalatay 1-da luulyo 1960 kiina waa burburtay. Gobollada Waqooyi ee Soomaaliya ee loo yaqaano (Somaliland) ayaa 1991-dii ku dhawaaqday in ay dalka intiisa kale ka go'een. Calankii uu Aden Cabdulle ku tilmaamay "nimco Eebbe" wuxuu noqday astaan rajo iyo midnimo oo aan weli si buuxda u hirgelin, dadka Soomaaliyeedna 66 sano kaddib weli waxa ay baadi goobayaan heshiis bulsho oo isu haya, waxa ay ku jiraan geedi-socod dawlad-dhis oo gaabinaya, adduunku gardaadiyo, si dhamaystiranna aan luguhiisa isku taagin, doodihiisuna aynan dhammaan.

# 66 SANO KADDIB, XUS IYO XASUUS IS-KHILAAFSAN

Sannad kasta, Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo dawladaha xubnaha ka ah waxay qabtaan xaflado lagu xusaayo 1-da Luulyo, iyada oo la sameeyo calan-taag saq-dhexe, dhoollatus ciidan, heeso wadani ah, iyo khudbado ku saabsan xornimada, midnimada dalka iyo waayaha iyo duruufaha ku xeeran. Sawirka ka soo baxa Villa Soomaaliya, fagaarayaasha Caasimadda, gobollada iyo xafladaha qurba joogta, waa kuwa farxad leh oo maalinta xorriyadda lagu faano.

Hase ahaatee, 66 sano kaddib dadka Soomaaliyeed kama midaysna xasuusta xornimada, iyo halgankii loo galay Jamhuuriyadda curatay 1-dii Luulyo 1960-kii.

Tusaale ahaan, Jiilasha koray burburkii kaddib 1991, waxay 1-da Luulyo la xiriiriyaan dawlad la'aan, dagaallo sokeeye, barakac iyo tahriib; xuska xornimada uma muuqdo mid ka tarjumaya

waayaha iyo duruufaha ku xeeran. Sidoo kale, qaybo badan oo ka mid bulshada Soomaaliyeed ee ku dhaqan Gobollada Waqooyi (Somaliland) waxay xusaan oo xusuustaan 26-Juun oo keliya, midnimadii dhacday 1-da Luulyo 1960-kii, waxa ay u arkaan in ay ahayd ilduuf siyaasadeed, dhaxalkeedana aan la mahdin, ayna reebtay xanuun iyo diidmo midnimo oo gaarsiisay in ay Israa'iil miciin bidaan.

Dhanka kale, barakacayaasha gudaha ee Jamhuuriyadda dhexdeeda ku rafaadsan iyo Qaxootiga daadsan daafaha adduunka, xasuusta xornimadu waxay ugu suntantahay dawlad ku fashilantay ilaalinta nabadda, xuquuqda aadanaha iyo rajadii ay ka qabeen nolol karaamo leh.

Natiijada guudna waa xus iyo xasuus is-khilaafsan. Waxaa lumay sheeko wadareedkii qaran iyo xasuustiisii midaysnayd. 66 sano kaddib, hoggaanka siyaasadeed ee dalku, heer qaran iyo heer dawlad goboleed, waxa ay hawada isu marinayaan farriimo xanbaarsan dhiilo iyo colaad. Madaxweynaha Qaranku waxa uu dadka Soomaaliyeed u sheegay, in qaybo badan oo dadka Soomaaliyeed ah in aysan heshiis ahayn, wadashaqaynna ka dhaxayn. Qayba kale oo gooni u istaagayna, in ay sii fogaanayaan. Haddaba, xuska waxaa ka muhiimsan in wax la iska weydiiyo xasuusta is khilaafsan, rajada iyo xanuunkii la wadaagay ee lumay!

## JAMHUURIYAD QABYO AH

1960 kii, Aqoonyahan la dhaho Anthony S. Reyner ayaa Middle East Journal ku daabacay maqaal cilmiyeed uu cinwaankiisu ahaa "Somalia: The Problems of Independence" (Soomaaliya: Dhibaatooyinka Madaxbannaanida). Reyner wuxuu xilligaa tilmaamay in Soomaaliya ay wajahaysay dhibaatooyin waaweyn oo dhismaha dawladnimada curdinka si toos ah u wiiqi karta, kuwaas oo ay ka mid yihiin: hay'adaha dowladeed oo aad u jilicsan, saboolnimo baahsan iyo kaabayaal dhaqaale oo liita, nidaam siyaasadeed oo ku dhisan qabiil, iyo cadaadis dibadeed oo ka faa'iideysan kara tabar darrooyinka gudaha, maadaama quwadaha waaweyn ee caalamka iyo kuwa gobolku ay si gaar ah isha ugu hayeen goobta istaraatiijiga ah ee Soomaaliya ku taallo.

66 sano kaddib, dhibaatooyinkaas uu tilmaamay Reyner badankood waa sidoodii, qaarna way ka sii Dareen, waxaana lumay dareenkii midnimada qaran, halka dagaalladii sokeeye ay dib u qeexeen macnaha dawladnimo, kalsoonida bulshada, iyo aragtida ummadnimo. Taariikhda iyo waayaheeda ayaa dhalan rogtay, dibna u qaabeeyey bulshada Soomaaliyeed ee lixdankii xanbaarsanayd himilo qaran oo mideysan, aragtida Soomaali weyn, iyo rajadii ku saabsanayd in la dhiso dawlad qab leh oo dimuqraadi ah, oo talada si nabad ah loola kala wareego.

Si kastaba ha ahaatee, taariikhdu waxay iftiimisay in dawladnimadu tahay geedi socod dheer oo u baahan hay'ado adkaysi leh, bulsho isku kalsoon, iyo hoggaan aragti fog leh. Soomaaliya waxay weli ku jirtaa marxaladdii dib u dhiska qaranimada, iyadoo ay weli jiraan caqabadihii taariikhiga ahaa, ee saamaynta ku yeeshay qaab dhismeedka siyaasadda, dhaqaalaha, iyo isku duubnida bulshada. 66 sano kaddib, si ay jamhuuriyaddu uga baxdo qabyda iyo ku tiirsanaanta dibedda, waxaa lagama maarmaan ah, in wadahadalku uu noqodo dhabbaha lagu hirgaliyo heshiis bulsho, danaha qarankuna ay noqdaan kuwo ka weyn danaha shakhsiga, aragtida qarannimo ay noqoto mid ka xoogan midda qabiil ama gobol, waxaana muhiima ah in dib loo dhiso sheeko qaran oo la wadaago.

Doodaha Jamhuuriyadda ee aan weli dhammaan waxaa u horreeya hirgalinta heshiis bulsho oo la isku raacsan yahay. Dastuurkii 1961 kii aftida loo qaaday ma helin waqti ku filan oo lagu hirgeliyo, waxaana soo afjaray afgambigii 1969 kii. Intii u dhexeysay 1969–1991, heshiis bulsho oo qaran ma jirin, waxaana beddelay keli talisnimo iyo hannaan aan matalin rabitaanka bulshada. Burburkii kaddib, Carta (2000) waxay dhashay Axdi kooban oo ku meel gaar ah, waxaana 2004 beddelay heshiiskii Embagati ee lagu dhisay dawladdii ku meel gaarka ahayd (Transtional Federal Government) oo iyana aan lahayn taageero bulsho oo ballaaran. Dastuurkii ku meel gaarka ahaa ee 2012 kii weli waa qabyo, isbedellada lagu sameeyayna maaha kuwa dadka Soomaaliyeed heshiis ku yihii. Run ahaantii, 66 sano kaddib xornimadii dalka, waxaa aad u xanuun badan in aan asaaska dawladnimada la yagleelin, laguna guulaysan taaba-gelinta heshiis bulsho oo loo dhanyahay.

## GUNAANAD

66 sano kaddib, Soomaaliya waxa ay maanta taagan tahay kalabayr adag oo u dhexeeya riyadii qarannimo ee lixdankii iyo xaqiiqda ah in aan weli la hirgalin dawladnimo ku dhisan heshiis bulsho oo cad, sharci iyo hay'ado la isku hallayn karo, iyo hoggaan aragti fog leh oo ka sarreeya xuduudaha qabiilka, gobollada iyo danaha gaarka ah.

Sawirka dalku waa sida geed weyn oo aan cagaar ka bixin balse leh xidido qoto dheer; waa geed aan in uu go'o looga baqayn, laakiin sugidda midho dhalkiisa lagu daalay, waayo biyaha lagu waraabiyo (heshiis bulsho, hoggaan daacad ah, iyo nidaam sharci ah oo ku dhisan caddaalad) weli ma helin. Jamhuuriyadda haddii la rabo in ay ka baxdo kalabayrkan adag, waa in ay ka guurtaa ku tiirsanaanta damaca shakhsiga ah, kan shisheeye, iyo danaha isdiidan ee qabaa'ilka, kuna dhaqaaqdaa "heshiis ceelalyo" oo cusub oo ay bulshada Soomaaliyeed ku qeexdo waxa ay dawladnimadu u taagan tahay, cida ay mataleyso, iyo xeerka lagu wada noolaanayo. Soomaalidu waxa ay ku maahmaahdaa: "markii ceelalyo heshiiso ayey xoolo biyo cabaan".



# BAQDAADEY SALAAMAAD:

## Hoyga Dhaqanka, Fanka & Ilbaxnimada



Maxamuud Cali
Aadan Hoorri



*Safar waxaan ku joogaa*
*Siraajkii baxaayiyo*
*Sancadiyo farsamadiyo*
*Sahaydii adduunyada*

*Ninba saami ku lahaa.*

Halkani waa dalka Ciraaq, waa astaanta cilmiga iyo garaadka, waa summadda aqoonta iyo garashada. Suugaanta iyo felsafadda waxa aad ba moodda in Baqdaad lagu canqariyey. Farshaxanka iyo fanka waxa aad ba u malaysaa in Baqdaad lagu gardaaddiyey. Dhuuxidda fiqiga iyo nuxuruka shareecada diinta Islaamka waxa aad qiraysa in caasimadda Baqdaad lagu iba-furay.

Ummad aan hayb iyo summad lahayn ayaa ka dhigan inay tahay; ummad baylah ah ama qaafil (summad) lagu tilmaami karo. Baqdaad waxa ay ilaashatay fankeedii kalaasiikiga ahaa, hiddeheedii labeenta ahaa, dhaqankeedii sowraca ku dheehnaa, ilbaxnimadeedii qota dheerayd, taariikhdeedii dheeha lahayd iyo dadnimadeedii lagu soo duulay hilaaddii 2003-dii.

Maansadani, waxa ay curatay 29.12.2023 anoo shaqo ku jooga caasimadda dalka Ciraaq—Baqdaad. Waxa ay ka hadleysaa booqashadii aan ku tegey waddankaas, anoo ka mid ah wafdi ka socdey dalka Soomaaliya—ujeedkayagu waxa uu ahaa inaanu qayb ka ahayn madal lagu soo bandhigayey Masraxa Furan ee loo dhanyahay (**مهرجان مسرحية الشارع العربي**). Baqdaad, waxa ay astaan u tahay ilbaxnimada iyo sooyaalka, waa meel ku caanbaxday aqoon iyo horumar. Baqdaad waxa ay summad iyo astaan u tahay cilmiga, qoraalka, hiddaha, fanka, suugaanta, sancada, felegga iyo culuunta xidaarka, arriimaha diinta iyo saafidda culuumta kala duwan.

Baqdaad, waxa aan ku soo arkay bulsho midaysan, dad wadajir u shaqaynaya, jiil ku hubaysan aqoon iyo sahan cusub, bedqab dhaqan iyo mid afeed, ilaalin aasaar iyo fahan ku dhisan jiritaan sooyaal. Ciraaq waxa soo maray marxalad mugdi ah, colaado foolxun, fikir xagjir ah, qax iyo qaxooti joogto ah, burbur iyo baaba' bulsho, gaajo iyo macaluul, xadgudub iyo gumaad-wadareed. Haa, iyadoo intaas oo dhan soo martay, ayey maanta muujisay geed-adayg iyo dib-u-kabasho dhaqaale, sixid siyaasadeed, toosin hoggaamineed, jacayl nololeed, waxbarasho tayo leh, iba-fur ilbaxnimo, godlin maan iyo gudasho ku dhisan garasho mug leh.

Afku waa hayb, qof aan hayab la hayna wax astaan qarannimo iyo gobannimo ah ma leh, "ha hilmaanin, ha liinbixin, ka muuqo meesha aad joogto adoo adiga ah". Sidaa awgeed, goobaha aan booqashada iyo daawashada ku tegey intii aan joogey caasummadda Baqdaad waxa ka mid ahaa; webiga caanka ah ee Dijla (**نهر دجلة**), Madxafka guunka ah ee dalka Ciraaq (**المتحف العراقي**), Hoyga Fanaaniinta Ciraaq (**نقابة الفنانين العراقيين**), Shaarica Al-mutanabbii (**شارع المتنبّي**) Jaamacadda Baqdaad (**جامعة بغداد**), Maqaamka iyo Jaamica Shiikh Cabdulqaadir Al-jeylaani (**جامع ومرقد الشيخ عبد القادر الكيلاني**) iyo gooba kale oo loo tago damaashaad iyo tamashlayn dalxiis. Ciraaq waa hoyga xadaaradda Carabta iyo ilbaxnimada aadanaha oo idil. Maansada Baqdaadey salaamaad oo aan ku ku cabbiray dareenkaygii suugaaneed intii aan joogey waxa ay leedahay saatan.

Safar waxaan ku joogaa
Soohdintii Ciraaq iyo
Saldhigii asuulkiyo
Saracii aftahamiyo
Siirkii dadnimadiyo
Seerihii ku caanbaxay
Taariikh salkeediyo
Haybteedu suulayn
Baqdaadey salaamaad
Salaamaad baqdaadey.

Safar waxaan ku joogaa
Saabaanka nabaddiyo
Gobannimo sirteediyo
Suummad-dooris diidiyo
Saqafkii xornimadiyo
Sargoyntii aqoontiyo
Hirar sarakacaayiyo

Halkii siinka lagu qoray
Baqdaadey salaamaad
Salaamaad baqdaadey.

Safar waxaan ku joogaa
Saabaankii iftiinkiyo
Sida xarafka loo dhigo
Aadanuhu sirtaa helay
Unkid saab-xidhkeediyo
Saawiyadda diintiyo
Xaramkii samaantiyo
Gundhiggii sinaantiyo
Suuradaha Qur'aankiyo
Siiradii Udgoonaha (SCW)
Culumadu ku saafeen
Baqdaadey salaamaad
Salaamaad baqdaadey.

Safar waxaan ku joogaa
Siraajkii baxaayiyo
Sancadiyo farsamadiyo
Sahaydii adduunyada
Ninba saami ku lahaa.
Sixaabtiyo daruurtiyo
Sagalkiyo xayaabkiyo
Saadaasha feliggiyo
Saynskiyo cirbixintiyo
So'da saanta qarisiyo
Saableyda hoosiyo
Isasuranta ubucdiyo
Suugaan rugteediyo
Baqdaadey salaamaad
Salaamaad baqdaadey

Taliskii saldanaddiyo
Saajinkii shajaaciyo
Sama-wade ka taliyaay
Sawaariikhda jebiyaay
Sirta dunida koobaay
Cadow seeta gooyaay
Saancaddaale qoolaay
Saddaam tii canqarisaay
Ilbaxnimo salkeedaay
Saxalkii ku soomaray
Si yar uga tallaabaay
Seermaweydo curataay
Sareedada ku maalaay
Sacaadiyo wanaagey
Sinji qaaya-wacaneey
Sooyaalka webigaay
Sowdkii carbeediyo
Suhradii baxaysaay
Baqdaadey salaamaad
Salaamaad baqdaadey.

- Dhammaad -

# HORUSOCODKA SIYAASADEED, SAMAGARADNIMADA IYO SIJIRAGARADNIMADA :

## Aragti Ku Saabsan Geeddi-socodka Ilbaxnimada Bulshada



Mansur Mukhtar Nurre
(Garyaqaan Masalasheege)



## HORDHAC

Taariikhda bulshada aadanaha waxaa lagu tilmaami karaa taariikh isbeddel joogto ah. Bulsho kasta waxa ay martaa marxalado kala duwan oo ay ku samaysato habab ay ku maamusho wada noolaanshaheeda, u qaybiso kheyraadkeeda, u ilaaliso amnigeeda, una qeexdo xiriirka ka dhexeeya xubnaheeda. Hababkaas iyo nidaamyadaasi ma aha kuwo mar keliya la gaaro oo weligood taagnaada; waa kuwo ku jira geeddi-socod joogto ah oo ay ilbaxnimadu marba heer cusub u guurto. Waxa aan isku dayayaa in aan maqaalkan ku lafaguro aragti ah in horusocodka siyaasadeed aanu ahayn dhacdo ku kooban mabda' ama xisbi gaar ah, balse uu yahay natiijada dabiiciga ah ee koritaanka ilbaxnimada bulshada. Sidoo kale waxa ay kala saaraysaa horusocodka guud iyo horusocodka suuban, iyadoo soo bandhigaysa laba fikradood oo cusub: Samagaradnimo iyo Sijiragaradnimo.

## BULSHAYSIGA AADANAHA IYO DHALASHADA ILBAXNIMADA

Aadanuhu waa noole bulsheed. Baahiyaha noloshu waxa ay ku khasbaan inuu la noolaado dad kale, halka wada noolaanshahani uu abuuro waxa loo yaqaan bulsho. Marka bulshadu samaysanto waxa isna dhasha jiraal cusub oo ka weyn qofka keliya; jiraalkaas waxa lagu magacaabi karaa qaran, dawlad, magaalo ama bulsho. Jiraalkan cusub waxa uu leeyahay baahiyo u gaar ah oo aan ku koobnayn baahida qofka keliya. Sidaas awgeed, bulshadu waxa ay ku khasbanaataa inay samaysato xeerar, hay'ado iyo habab lagu hago wada noolaanshaha. Garashada iyo habaynta jiraalkan cusub ayaa ah waxa aynu ugu yeedhayno ilbaxnimo.

## ILBAXNIMADU WAA GEEDDI-SOCOD

Aadanuhu ma aha noole ku ekaada waxa uu helay. Waa noole fekera, hal-abuura, wax is waydiiya, khaladkiisana dib u eega. Sidaas darteed ilbaxnimadu ma istaagto meel; waxa ay ku jirtaa socdaal joogto ah. Hase yeeshee, ilbaxnimo kasta waxa ay muddo ku hakataa nidaam gaar ah. Mudadaas waxa nidaamku abuuraa guulo iyo faa'iidooyin, laakiin sidoo kale waxa uu dhalin karaa tabashooyin aan markii hore muuqan. Marka tabashooyinkaas la dayaco, way bataan, way is biirsadaan, ugu dambayna waxa ay isu beddelaan boogo bulsheed oo u baahan daawayn.

## BAAHIDA HORUSOCODKA

Marka boogaha bulsheed ay gaadhaan heer aan lagu sii noolaan karin, waxa bulshada gudaheeda ka dhasha dhaqdhaqaaq cusub. Dhaqdhaqaaqani waxa uu rumaysan yahay in dhibaatadu aanay kwliya ka soo askunmayn dadka, balse ay ku jirto nidaamka iyo qaab-dhismeedka bulshada. Sidaas darteed waxa uu ku baaqaa in laga guuro nidaamkaas laguna beddelo nidaam cusub oo aan bulshadaasi hore u tijaabin. Dhaqdhaqaaqan ayaa ah mid aan ugu yeeri karno Horusocod. Horusocodku ma aha wanaag iyo xumaan toona. Waa jiho siyaasadeed oo rumaysan in xalalka mustaqbalka laga raadiyo nidaam cusub halkii dib loogu noqon lahaa nidaamkii hore.

## DOODDA HORUSOCODKA IYO DIBUSOCODKA

Marka horusocodku soo baxo, waxa uu si dabiici ah u dhalinayaa iska hor imaad siyaasadeed iyo bulsheed. Dhinaca horusocodku waxa uu ku doodaa in nidaamka jira uu noqday isha dhibaatada, halka dhinaca kale uu ku doodo in horusocodku bulshada u wado meel aan la garanayn oo laga yaabo inay ka khatar badan tahay meesha ay joogto.

Halkaas ayay ka dhalataa doodda u dhexaysa Horusocodka iyo Dibusocodka. Si kastaba ha ahaatee, labadan eray midkoodna ma xanbaarsana qiime sugan. Horusocod kastaa ma horseedo wanaag, sida aanu dibusocod kastana mar walba u horseedin xumaan. Taariikhdu waxa ay marag ka tahay in bulshooyin badan loo raray nidaamyo cusub oo dhaliyey boogo ka waaweyn kuwii laga cararay.

## SAMAGARADNIMADA

Si loo kala saaro horusocodka wanaagsan iyo kan bulshada aan wanaag u horseedin, waxaan halkan ku soo jeedinayaa fikrad aan ugu yeeray Samagaradnimo. Samuhu halkan ma aha wanaag guud oo aan qeexnayn. Samuhu waa garashada isha boogaha bulsheed iyo helidda dawada ka saarta bulshada boogahaas. Isha ugu weyn ee boogaha bulsheed, sida aan qabo ama aan u arko, waa gumowga garaadka dadka iyo aqoonta baadiyowday ee u horkacda qofka inuu qiimihiisa, nabadgalyadiisa, xorriyaddiisa iyo jiritaankiisaba ku xidho burburinta ama hoosaynta jiritaanka qof kale ama koox kale. Samagaradku waa qofka garta habka loo dhisi karo hay'ado iyo nidaam bulsheed oo qof kasta u dammaanad qaadaya nolol, amni, xorriyad, caddaalad iyo karaamo, iyadoo aan xuquuqdaas lagu dhisin duudsiga xuquuqda cid kale. Sidaas darteed Samagaradnimadu waa nooc ka mid ah horusocodka, balse ma aha horusocod kasta.

## SIJIRAGARADNIMADA

Dhanka kale, mar haddii aan soo bandhignay fakradda samagaradnimo waxaynaan hurayn farmuuqidda fakradda ama aragtida lidka ku ah samagaradnimada ama cidda uu samagaradku wajaho kolka uu heensaynayo geediga caanaha leh ee horusocodnimada samagarasho, ciddaas iyo fakraddaas oo ah Sijiragaradnimo ama Sijiragarad. Sijiragaradku waa qofka garashadiisu ku koobnaato ilaalinta waxa jira, inkasta oo ay caddahay in nidaamka jira uu sii dhalinayo boogo bulsheed. Sijiragaradnimadu ma aha ilaalinta nidaam wanaagsan oo keliya; waa diidmada isbeddelka Samagaradnimadu soo jeedinayso, iyada oo lagu dheggan yahay nidaam aan sii xallin karin dhibaatooyinka bulshada.

## GUNAANAD

Horumarka ilbaxnimadu ma aha socdaal toosan oo mar kasta wanaag ku dhammaada. Sidoo kale, dib ugu noqoshada wixii hore mar walba ma aha khalad. Sidaas darteed, kala soocidda keliya ee u dhexaysa horusocod iyo dibusocod kuma filna fahamka dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed. Waxa lagama maarmaan ah in la kala saaro horusocod kasta iyo horusocodka daweynaya boogaha bulshada. Sidaa darteed, waxaynala gudboon in dhaqdhaqaaqa horusocodnimo ee daweynaya boogaha bulshada loogu yeedho Samagaradnimo, halka diidmada horusocodkaas loogu yeedho Sijiragaradnimo.

Labadan fikradood waxa ay ujeeddadoodu tahay in doodda siyaasadeed laga raro isqabqabsiga ku saabsan isbeddelka laftiisa, loona raro qiimaynta tayada isbeddelka iyo awooddiisa uu ku daweyn karo boogaha bulshada.








































**Website**: https://maragnews.com/
**Email**: editor@maragnews.com

MAJALADDA
MARAG